FSNAU
Qaybta Falanqaynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada ee Soomaaliya

# Hubinta Cuntada & Nafaqada

Lasoo saaray
Bishii 9aad, 2009

## Warbixin gaar ah - Falaqaynta Guga '09 kadib

Warbixintan gaarka ah ee FSNAU waxay soo koobaysaa natiijooynka ugu muhiimsan ee qiimaynta falanqaynta *Guga* '09 kadib, taas oo ka soo baxday hawlo daraasadeed la sameeyay (bisha Todobaad 1-21), heer gobol (Bisha Todobaad 22-29),iyo kulan heer qaran (Bisha sideedaad1-14) iyo kulamo ku saabsan xaqiijinta farsamada iyo su,aal bixinta Hay,adaha la iskaashado (Nafaqada, Bishs Sideedaad 17 iyo Hubinta cuntada, Bisha sideedaad19). FEWS NET Somalia iyo 102 hay,adood oo la iskaashado, oo ay ku jiraan maamulada heer gobol, hay'adaha qaramada midoobay,hay'adaha caalamiga iyo ururada maxaliga ah ayaa ka qayb qaatay ama taageeray hawshaan qiimaynta iyo falanqaynta Guga '09 . FSNAU waxay ku soo bandhigtay natiijooyinkaas kulan lagu qabtay bish 8aad 21, qolka Xooghaynta taaageerada Somaliya ee magalada Nairobi, waxaana ay soosaareen warsaxaafadeed bisha 8aad, 24keedii. Warsaxaafadeedka Iyo bandhigaas lagu sameeyay natiijooynka waxaa laga heli karaa websaytka FSNAU.

Cimilada

Suuqyada

Nafaqada

Beeraha

Xoolaha

Colaada Sokeeye

Arrimaha Gobolka ee Soo Shaacbaxaya

Iskudhafka Falanqaynta Sugnaanta Cunnada

### Natiijooyinka Ugu Muhiimsan

Natiijoonka qiimaynta xilliga Guga '09 ee FSNAU,FEWS-NET, iyo hay'adaha ay isbahaysteen waxay xaqiijinayaan in **Somaliya ay ka jirto xiisadii bani,aadanimo ee ugu xumayd sideed iyo toban sano, iyadoo nus dadweynaha ama qiyaas 3.64 milyan ay u baahan yihiin taageero gurmad oo hab-nololeedka ah iyo taageero nolol badbaadin ah ugu yaraan ilaa iyo December 2009.** Tani waxay muujinaysaa inay sii xumaaneysa xaaldda nololasha iyo nafaqadu laga soo bilaabo sanadka horaantiisa. Inta badan dadka 3.64 ah ee dhibaatada ku jira ama 75% dadweynaha waxay joogaan koonfurta iyo gobolada dhexe ee Somaliya. Walaaca sii kordhaaya waxa waaye dagaalada soo noqnoqonaaya iyo dagaalada oo ka dhacayaa meelaha ay ka jiraan dhibaatooynka si cunto la'aan iyo nafaqadaradu. Tani culays kuma aha oo kali ah dadka horeyba u dhibaataysnaa laakiin waxay dhibaato ku noqotay gargaarka bani,aadanimo si loo gaarsiiyo dadka baahidu u hayso. Marka la arkay nuxurka dagaalada soo noqnoqonaya, FSNAU waxay soo-saartay digniin tilmaamaysa kasiidarid xaalada baniaadanimo waxayse ku xirnaan doontaa baaxada dagaalada iman doona wiigaga ama bilaha soosocda.

Heerka nafaqo ee degdega ahi waa sii xumaanaynsay marka laga soo bilaabo Bishii 1aad ee sannadka qaybo badan ee dalka, sidaa daraadeed shantii cunugba mid ayaa nafaqadaradiisu liidata, halka labaatankiii cunugba mid aad u nafaqadaran yahay. Biloga sanadkaan tirade caruurta nafaqadaroodu liidato waxay ahaayeen lixdiiba mid. Qiimayntaas qaran ee liidashada nafaqadarada waxay ka mid tahay tan ugu sareysa aduunka. Hadda, qiyaas ahaan 285,000 oo caruur da'doodu ka yartahay 5 sanno ayaa nafaqodaran ba'ani haysaa, kuwaas oo 70,000 ay nafaqadoodu aad u liidato ayna qarka u saran yihiin dhimasho haddii aanay helin xanaano ku haboon. In ka badan sadexdii meelood laba oo ilmahaas ah waxay joogaan koonfurta iyo gobollada dhexe ee Somaliya. Dadka hadda dhibaatada bani'aadan hayso waxaa ka mid ah 1.4 milyan oo reer miy ah waxyeelana ka soo gaartay abaaraha, 655,000 qof oo saboolka reer magaalka ah oo lal agdamaya qiimaha sare ee cuntada iyo waxa aan cuntada ahyn, iyo 1.3 milyan oo barakacayaal ah kuwaas oo ka cararya dagaalada iyo colaadaha ( Jaantuska 1 iyo Jadwalka 1). Arrimaha saameynta ku leh xaalada xun ee bani'aadanimo waxa ka mid ah abaaraha, qiimaha sare ee cuntada iyo waxyalaha aan cuntada ahyn iyo dagaalada sii kordhaaya ee dadweynah barakicinaaya.

**Ka siidarida Gurmadka bani'aadanimo (GB) ee Gobolada dhexe**

Meelaha xuunta u ah gurmadka bani'aadanimo ee aad xun waa Gobolada Mudug, galgaduud, Hiiraan, iyo Bakool ee koonfurta iyo bartamaha Somaliya, halkaas oo abaara ay ka jireen laba sanno iyo badh. Baxaada dhibaatadu aad ayey u weyn tahay , taasoo ilaa 65% dadweynuhu ay ku jiraan xalaad bani'aadnimo , kuwaasoo 75% ay u baahan yhiin ***Gurmad bani'aadanimo oo deg deg ah.*** Abaartu waa sii xumaatay kadib markii shan xilli oo isdaba jooga ay roobku xumaaday. Xooluhu waa le'edeen, xoola dhaqatadii caydha nongotayna waxay isugu soo urureen tuulooyinka iyo magaalooyinka ayagoo raadinaya kaalmo. Xaalada nafaqadu waa heer qaylo dhaan, Hab-nololeedka xoolaha iyo beer iyo xoola dhaqatada deegaanadas ayaa loo aqoonsaday ***Heer Xun,*** lana filaayo inay ka sii darayso. Xaalada nafaqo ee xoolo dhaqatada Bakool waa ka sii daraysaa waxaana loo aqoonsaday in ay tahay ***Heer aad u xun.*** qodobada caawiyayna waa xaalada xun ee cunto xumida, barakaca socda, iyo cuduro badan oo ay kaalmeeyeen la'anta adeega guud ee dadweynaha dhibaataysan.

**Kordhka Tirada Barakacayaasha (IDPs)**

Tirada dadka barakacayaasha (IDP) si xoog leh buu kor ugu kacay ilaa iyo bishii 1aad sannadka aad , asagoo ka soo kacay 1 milyan tagayna 1,3 milyan qof, waxuu kor u kacay labaatan iyo lix boqolkiiba lix bilood gudahood. Barakacayasha cusub badankoodu waxay ka carareen dagaalada iyo shaqaaqooyinka waxayna isugu soo urureen shabeellooyinka iyo gobolada dhexe. Baarista nafaqadu waxay cadeysay in dadweynaha barakacayaaashu ay yihiin kuwo aad u jilicsan, iyadoo barakacayaashu la ogaaday in ay ka sareyaan xaaladda dhexdhexaadka ah ee qiimaynta nafaqadarada ee caalamiga oo ah 20% marka loo eego dadka aan barakicin oo ah 18%.

**Xaaladda cunta xumida ee saboolka Magaalooyinka**

Tiro aad u badan oo saboolka magaalooyinka ah ayaa wali ku jira xaalad dhibaato ee nolasha, iyagoo lalag damaya si ay u helaan nololmaalmoodkooda, inkastoo ay hoos u dhaceen qiimha cuntadu, iyo waliba mushaarooyinkuna shaqooyinka oo hagaagay. Ugu dhawaan afarmeelood (23%) tirade guud ee dadweynaha magalada ama 655,000 qof ayaa u baahan kaalmo bani'aadanimo. Tiradani waxay in yar ka hooseeysaa marka loo eego tirad 705,000 qof oo ah tii Deyrta '08/09. Marka loo eego tirada guud ee dhibaataysan, 520,000 waa saboolka reer magaalka oo ku qiimaysan **Hab-nololeedka iyo cuntada oo aad u xun (XCHAX)** waxayna u baahan yihiin kaalmo hab-nololeedka ah oo deg-deg ah, halka135,000 oo saboolka magaaladu ay ku jiraan **Gurmad Bani aadanimo (GB)** ayna u baahan yihiin kaalmo hab-nololeedka iyo badbaado nolol.

**Abaaro soo ifbaxaya, Cunto xumo iyo Dhibaato Hab-nololeed (XCHAX) ee xoolo dhaqatada Waqooyi**

Waxaa jirta qaylo dhaan ah xaaladda cuntada iyo nafaqada ee bulshada xoola dhaqatada iyo beero-xoolao dhaqatada ee waqooyiga, oo ay keentay ifo-faale abaareed kadib markii roobabkii xumaadeen 2-3 xilli oo isku-xiga. Degaanadaas waxaa saamaysay xilliyo badan oo biyo la'aan ah, kacdoon hayaan xoolo, xoolo badan oo xerada laga bixiyay iyo heer dayn oo sareysa. Xaaladu hadda waa sii xumaanaysaa, sida ay cadaynayso qiimaynta nafaqadarada ee sii kordhaysa gaartayna heer xaalad degdeg ah 15% meelaha qaar.

FSNAU - Somalia

United Nations Somalia,
Ngecha Road Campus
Box 1230, Village Market,
Nairobi, Kenya
Tel: +254-20-4000500
Cell: +254-722-202146
/ 733-616881
Fax: +254-20-4000555
Email: info@fsnau.org
Website: www.fsnau.org

Qiyaastii 255,000 qof ayaa waxaa loo qoondeeyay ***Cuntada iyo Hab-nololeedka oo aad u xun***, iyadoo sidoo kale 25,000 qof ay u baahan yihiin ***Gurmad Bani'aadanimo***. Meelahaasi way ka duwan yihiin koonfurta iyo bartamaha Soomaliya, oo kaalmada bani'aadanimo gaadhsiinteedu dhib malaha, Sidaa daraaadeed meelahaasi waa in ay helaan gargaar hab-nololeed oo deg-deg ah iyo kaalmo nafaqo, si looga hortago in xaaladdu noqoto ***Gurmadka bani'aadnimo*** mid u gudubta

**Wax-soosaarka Dalagga caadiga iyo Hagaaga Cunto Helida Meelo ka Mid ah Koonfurta.**

Wax-soosaarka dalagga *Guga* '09 ee koonfurta Somaliya waa midka labaad ee ugu sareeya todobadii sanno ee ugu danbeysay waxuuna u dhaw yahay celceliska kadib dagaaladii sokeeye ee waxsoosaarka Guga (102%). Si kastaba haahaatee, dalagga badankiisu waxaa laga soo saaray saddexda gobol ee shabeelaha hoose (51%), Baay (27%), iyo Jubbada dhexe (14%). Waxaa kale oo jira xilli aan cadi ahayn dalaga la beero oo laga beero Jubbada hoose,Jubbada dhexe iyo shabeelada hoose oo roob yar helaan xiliga xagaaga awgeed. Arrimaha u sahlay sadexdaas gobol in ay waxsoosar fiican yeeshaan waa roobabkooda oo celcelis ahaan fiican ( Roobabka GUga iyo Roobabka Deyrta), iyo iyagoo dalag caadiga ka sareeya soosaaraya xilliga aan caadiga ahayn, habka socdaalkooda oo soo hagaagay (shabellada hoose), biyaha oo caadi loo helo, iyo dhulka la beero oo kordhay shabeelada hoose iyo jubbada dhexe. Cunto helidu waa ay hagaagtay beeraleyda reer Baay, shabeelada hoose, iyog obolada jubbooyinka, waxsoosaarkooda oo kordhay awgeed iyo shaqa helida beeraha oo hagaagtay iyo mushaarka oo kordhay.

**SAAMAYNTA WAXQABADKA**

***Waxtarka bai'aadanimo***

- waa in la fuliyaa Talaabooyin lagu kordhinaayo hawlgalka bani'aadanimo iyo badbaadada si loo hubiyo in tirada dadka baahani ay heleen gargaar

***Gurmad Mucaawimo bani'aadanimo si loo Badbaadiyo Nolosha***

- Waxaa loo qoondeeeyay goobaha hab-nololeedyada lagu tilmaamay in ay ku jiraan Gurmad bani Aadani,nimo (GB)
- Waxaa loo qoondeeyay goobaha iyo hab-nololeedyada lagu tilmaamay in ay ku jiraan xaalad nafaqo oo halis ah ama aad u hoosaysa.
- waa in la siiya muhiimada gaar ah goobaha baahidooda hore/hadaba ay ka badan yihiin waxqabadka.
- In dardar la galiyo goobaha ay xaaladoodu ka sii darayso (i,e, Gobolada dhexe, Hiiraan,, Shabeelada dhexe, iyo Bakool).
- Dadka dalka gudihiisa ku barakacsan iyo reer magaalka lagu tilmaamay in ay ku jiraan GB isla markaana nafaqo daro heer sare ah ku jira.
- In wax loo qabto dadweynaha dhibka badai haysto ee GB ee waqooyiga (Beero-xoolo dhaqatada Togdheer iyo xoolalayda habnololeedka Sool ).

***Taageero Hab-nololeed oo Gurmad ah***


- waxa Sii Mudnaan leh goobaha iyo hab-nololeedyada ku jira xaaladda gurmadka binaadnimo
- waxa Sii mudnaan leh dadweynaha u baahan **GB,** tsi loo dhamaystiro hawlgalada badbaadinta nolosha**.**
- In la dedejiyo kaalmada hab-nololeedka degdega ah ee dadweynaha (**XCHAX)** ee koonfurta (Shabeelada dhexe, Gedo, iyo Bakool)
- In la kordhiyo kaalmada hab-nololeedka degdega ah ee dadweynaha lagu qiimeeyey (**XCHAX)** Meelaha abaaruhu saameeyeen ee waqooyi-ga.
- In la bartilmaamsado dadweynaha reermagaaalka saboolka ah kuwas oo muddo ku soo jiray (**XCHAX)**

**Sanduuqa 1: Tiro la isku daray oo ah dadka deggan miyiga, magaalooyinka iyo dadka soo barakacay ee Soomaaliya, bishii 7aad-12aad ee 2009**

| Gobolka | Isku Darka Tirada Dadka ee UNDP 2005 | Isku Darka Tirada Dadka ee UNDP 2005 | Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah ee UNDP 2005 1 | Xiisada Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX) | Xiisada Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX) ee Haysata Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah 2 | Dadka Magaalooyinka ee ku jira Gurmad Bina-aadamnimo (GB)2 | Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah ee ee ku jira Gurmad Bina'aadamnimo (GB)2 | Isku Darka Dadka ku jira XCHAX iyo GB oo ah % Tirada Guud ee Dadweynaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Waqooyi** | | | | | | | | |
| Awdal | 305,455 | 110,942 | 194,513 | 5,000 | 25,000 | 0 | 0 | 10 |
| Woqooyi Galbeed | 700,345 | 490,432 | 209,913 | 55,000 | 30,000 | 0 | 0 | 12 |
| Togdheer | 402,295 | 123,402 | 278,893 | 55,000 | 75,000 | 20,000 | 5,000 | 39 |
| Sanaag | 270,367 | 56,079 | 214,288 | 20,000 | 75,000 | 5,000 | 15,000 | 43 |
| Sool | 150,277 | 39,134 | 111,143 | 15,000 | 35,000 | 5,000 | 0 | 37 |
| Bari | 367,638 | 179,633 | 202,737 | 80,000 | 0 | 25,000 | 0 | 29 |
| Nugaal | 145,341 | 54,749 | 75,860 | 25,000 | 15,000 | 0 | 5,000 | 31 |
| **Isku darka** | **2,341,718** | **1,054,371** | **1,287,347** | **255,000** | **255,000** | **55,000** | **25,000** | **25** |
| **Gobollada Dhexe** | | | | | | | | |
| Mudug | 350,099 | 94,405 | 255,694 | 30,000 | 40,000 | 0 | 110,000 | 51 |
| Galgaduud | 330,057 | 58,977 | 271,080 | 15,000 | 35,000 | 10,000 | 200,000 | 79 |
| **Isku darka** | **680,156** | **153,382** | **526,774** | **45,000** | **75,000** | **10,000** | **310,000** | 65 |
| **Koonfur** | | | | | | | | |
| Hiiraan | 329,811 | 69,113 | 260,698 | 25,000 | 35,000 | 5,000 | 160,000 | 68 |
| ShabelleDhexe | 514,901 | 95,831 | 419,070 | 25,000 | 60,000 | 0 | 160,000 | 48 |
| ShabelleHoose | 850,651 | 172,714 | 677,937 | 35,000 | 50,000 | 10,000 | 5,000 | 12 |
| Bakool | 310,627 | 61,438 | 249,189 | 25,000 | 65,000 | 0 | 70,000 | 52 |
| Baay | 620,562 | 126,813 | 493,749 | 20,000 | 5,000 | 0 | 5,000 | 5 |
| Gedo | 328,378 | 81,302 | 247,076 | 30,000 | 80,000 | 0 | 40,000 | 46 |
| Jubbada Dhexe | 238,877 | 54,739 | 184,138 | 10,000 | 5,000 | 0 | 0 | 6 |
| Jubbada Hoose | 385,790 | 124,682 | 261,108 | 20,000 | 10,000 | 0 | 0 | 8 |
| **Isku darka** | **3,579,597** | **786,632** | **2,792,965** | **190,000** | **310,000** | **15,000** | **440,000** | **27** |
| **Banaadir** | **901,183** | **901,183** | **-** | 30,000 | **-** | 55,000 | - | 9 |
| **Isku Darka Guud** | **7,502,654** | **2,895,568** | **4,607,086** | **520,000** | **640,000** | **135,000** | **775,000** | **28** |

| Tirada dadka la qiimeeyey iyo kuwa ay suurtagal tahay inay galay XCHAX & GB | Tirada saamoobay | % ee Isku darka guud ee dadweynaha | Qaybinta dadweynaha ku jira xiisad |
|---|---|---|---|
| Dadka Magaalooyinka ee La Qiimeeyey ee ku jira XCHAX & GB | **655,000** | **9** | **17%** |
| Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah ee la Qiimeeyey ee ku jira XCHAX & GB | **1,415,000** | **19** | **38%** |
| Qiyaasta tirada dadka cusub ee soo barokacay –oo la cusboonaysiiyey 2dii bishii 8aad | **1,420,000** | **19** | **38%** |
| Qiyaasta tirada dadka muddada dheer barakacsanaa | **275,000** | **4** | **7%** |
| Qiyaasta dadka deggan dhulka miyiga ah, magaalooyinka & dadka barokacsan ee ku jira xiisad | **3,765,000** | **50** | **100.0%** |

**Khariidadda 1: Khariidadda Qoondaynta Xaaladaha Ee Isku Xiran Ee Soomaaliya, Saadaasha Dadka Deggan Dhulka Miyiga Ah, Magaalooyinka Iyo Dadka Gudaha Ku Barokacsan, Bisha 7Aad-Bisha 12Aad Ee 2009**



## WARBIXINTA QAYBAHA

### CMILADA

***Waxtarka roobka***

Bilowga roobabka ee xiliga Guga'09 waxay ahaayeen caadi (Dabayaaqadii bisha saadexaad iyo horaantiibish afraad) waqooyiga Somaaliya guud ahaan, qaybo ka mid ah koonfurta Somaliya. Si kastaba ha ahaatee, baahsanaanta roobka iyo xoogiisuba way kala gedisnaayeen, guud ahaana waxtarka roobabku waxay si wayn uga hooseeyeen sida caadiga ah, gaar ahaan dhulka abaaruhu saameeyeen ee Gobolada dhexe ee iyo qaybo badan oo ka mid ah dhulka xoola dhaqata ee gobollada waqooyi. Meelaha roobabka Gugu ay si liidata uga da'een ama aan helinba waxa ka mid ah gobolada Hiiraan, Mudug, Galgaduud, Nugaal, Sool iyo qaybo ka mid ah Sanaag iyo Togdheer.

Gobollada waqooyi galbeed, roobabka Karantu way soo daaheen baahsanaatoodu way xadidnayd waxayna ku koobnaayeen dhulka beero iyo xoolo daqatada ee W/galbeed iyo Awdal, halka aanay karantu ka di'in dhulka beero Iyo xoolo daqatada ee gobolkaTogdheer. Waxtarka roobka ay da'ay gobolka Somalida Etoobiya iyo gobolka waqooyi bari ee Kenya ee deriska la ah Somalia in badan wuu ka hooseeyay sida caadiga ah. Gobolada beeralayda ee koonfureed sida Baay, Shabeelada hoose iyo jubbada dhexe waxtarka roobabka Gugu way fiicnaayeen ilaa-xad marka la fiirsho cadadka guud (150-250 mm), tirda maalmaha roobabku da'een iyo baahsanaanta. Taa waxaa dheer, roobabkii Xagaaga oo fiicnaa oo faa,iido laga helay dhulbadana laga soo sheegay sida dhulka xeebta,dhulka banka ee jubooyinka iyo shabeelada hoose. Haseyeeshee, dhulka xoolo dhaqatada iyo beero iyo xoolo dhaqatada ee Baay,Bakool, jubbada hoose iyo in badan oo golka Gedo waxay heleen roobab fudud, oo googoos ah oon baahsanayn.

***Xaalada Daaqsinta***

Gobolada Waqooyi iyo kuwa dhexe dhulka xoolo dhaqatada xaalada daaqsintu aad bay u xuntahay sababtoo ah dhibaatooyin badan oo waxyeeleeyay oo isku dhexjira iyo waxtarka roobabkii Guga 09 oo xumaa waqooyiga iyo xilligii Jiilaalka oo soo hormaray dheeraadayna, iyo xilliyo isku xiggay oo roobabku xumaadeen. Dhuldaaqsimeed yar ayey hagaagtay xaalada daaqu oo helay roobab meel dhexaad ah, sida qaybo dhulka xoola dhaqatada Buuraleyda iyo Gubanka ee gollada waqooyi galbeed, qaybo ka mid ah gobolka Bari ah, iyo qaybo dhulka xoolaha ee Caduun, deexda ee gobollda dhexe Iyo iyo waqooyig. Hagaagaa xaalada dhaaqa dhulka xoolaha ee Nugaal, waqooyi iyo dhulka xoolaha Caduun ee gobolada dhexe waxaa muujinaya is bedelka barista is-barbar-dhiga ee dhirta marka la barbar dhigo sanadkaan macluumaad waqti dheer la ururiyey (sawirka 1 iyo 2).

Khariidada xaaladda dhaaqsinta ee gobllada koonfurta waxay tustay inay caadi ku dhowdahayd tobankii cisho ee u dambeeyey bisha todobaad, gaar haan xeebaha iyo dhulka gudaha u dhaw ee gobollada Juba Iyo shabeele(sawirka 2). Marka loo babar dhigo ceceliska taariikheed, dhirtu caadi bay u dhawdahay inta badan gobolka Bari. Khariidada daaqsintu waxay tusaysaa xaalada dhirta inay aad u xuntahay gobolada dhexe, in badan oo Gedo iyo Bakool, iyo sidoo kale qaybo badan oo gobolada waqooyi.

***Sadaasha cimilada iyo roobabka ee xilliga Dayrta soo socota ( Badhtamaha Oktoobar ilaa bisha Diisambar 2009)***

Sadaasha cimiladu waxay odorosayaa in la filayo roobab laxaad Ibilaha sagalaad iyo labiyo tobnaad (Elniino) sida laga xaqiiyey Geeys weynaha Afrika, taas oo kordhinaysa in ay u ekaato roobab caadi ka sareeya ama u dhaw ay helyaan Soomaliya inta lagu jiro xilliga **Deyrta** ee soo socota. Roobab baaxad leh ayaa laga filayaa gobolada dhexe iyo koonfurta somalia. Cawaaqibka laga filaayo arintaan waxaa ka mid ah in abaartu dhamaato, xoolo badan oo abartii hore jilcisay ay dhintaan iyo dooxooyinka wabiyada jubba iyo shabeele oo aad u fataha.

**Khariidadda 2: Cabirka dhabta ah ee kala duwanaanta Daaqa ee 10 kii Dambe ee Bishii 7aad ee '09**







**Figure 1: Xaaladda Daaqa Dooxada Nugaal Isbeddelka Cabirka Cagaarka**



**Jaantuska 2: Xaaladda Cagaarka Dhulka ee cadduunka gobollada dhexe**



## COLAADA SOKEEYE


Qaybtii ugu horeysay ee 2009, xaalada colaada sokeeye waa soo hagaagtay in yar meelaha qaar, laakiin koonfurta iyo bartamaha colaadu waa sii xumaatay. Meelaha saldhiga u ah iska horimaadyada koonfurta iyo bartamaha waxay u dhaxaysay degenaansho yar iyo iska horimaad dhab ah, xaalada nabadgelyana intaa way kasii daraysey laga bilaabo May 09. Tani waxay kordhisay Degenaansho la,aan iyo colaad wax u dhinta magaalooyinka. Wax dhimidda tooska ah waxaa ka mid ah iska-hor- imaadyo sii kordhaya oo ay la socoto dhaawac iyo dhimasho, baabi'in hantida guud iyo mida gaarka ah, ku xadgudubka xuquuqda aadanaha, iyo sii korodhka caruurta shaqaale loo qorto iyo barakac 91,000 qof ilaa July 09.

Waxyeelada dadban, aan tooska ahayn waa la dareemi karaa, iyadoo sii xumaysay hubinta cuntada iyo fursadaha hab nololeedka. Hakis gelinta habsami u socodka hawlaha ganacsiga; sida qas suuq, ganacsi iyo gaadiid, hoos u dhac dhaq-dhaqaaqa dhaqaale iyo hawlihii gargaarka bani' aadanimada oo gaari waayay goobihii ay ka shaqayn lahaayeen. Meelaha dhibaatadani si qoto dheer iyo si dhexdhexaad ahba raadka ugu reebtay waxay ku iftiinsan tahay khariidada X.

Dagaal cusub baa ka dhex qarxay Dawlada ku meelgaarka (DKM) iyo xoogaga ka soo horjeeda Muqdushu May 09 taas oo keentay dhimasho shacab, bililiqo ama burbur goobo ganacsi iyo guryo badan, sidoo kale barakac baaxadwayn oo ku kala baahay gudaha wadanka iyo xeryaha qaxootiga ee Kenya.

Dagaalku waxuu ku fiday qaybo ka mid ah Shabeelada dhexe, gobolada Hiiraan iyo galgaduud, taas oo hakisay in mudo ah gaadiidkii waqooyi u socday. Waxay kaloo dhawr goobood dagaalo ku dhex mareen ciidamada Dawladda ku meelgaadhka ah iyo kuwa mucaaradka ku ah Galcad (Galguduud), baladweyne, Buulo-barde (Hiiraan), Buulo-xaawo iyo Luuq (Gedo), taasoo xanibaad gelisay dhaqdhaaaq dadka iyo ganacsiga, isla markaan kordhisay qiimihii gaadiidka, suuq geenta badeecadahana hoos u dhigtay. Waxaa jira warar la xaqiijinayo in hogaamiyayaashii kooxaha oo ay Itoobiya taageerayso ay ciidamo ku urursanayaan xuduuda itoobiya iyadoo qaybi soo gashay Beletweyne, Luuq iyo Caato- magaalada Ceelberde (Bakool) iyagoo doonaya meelahaas in ay qabsadaan. Lixdii bilood ee ugu horeysay 2009, waxaa ku dhintay Muqdisho kali ah 500 qof oon waxba galabsan, waxaana dhaawacmay 2,500-2,800 oo la geeyaya ispitaalada qaliinka ee Muqdisho. Qiyaas ahaan dhibaatada runta ee shacabka gaartey lama garanaayo sabatoo ah qoraal rasmi ah lagama hayo iyo iyadoon la tagi karin meelaha colaadu ka jirto.

**Khariidadda 3: Natiijooyinka Saamaynta Nabad Sugid La'aanta Soomaaliya, Bisha 7aad ee '09**




Source: FSNAU, July 2009

Waxaa sii kordhaya warbixinada Iska-horimaadka ku salaysan khayraadka, khaasatan muran lahaanshaha dhul qaybo ka mid ah Shabeele iyo xuduuda u dhaxaysa Hiiran iyo shabeelada dhexe. Qabaa,ilka oo isku dagaala khayraadka daaqa iyo biyaha inta u dhaxaysa xuduuda degmooyinka Jawhar iyo Jalaqsi ee shabeelada dhexe oo keentay qax iyo barakac xoogan oo ay dadku ka tageen ama cidleeyeen khayraadkii qiimaha lahaa ee biyaha iyo daaqa. Si kastaba ha ahaatee, Jid-gooyadii, dhacii, baad doonkii iyo canshuurtii sarraysey; hadda hoos bay u dhacday, xaalkuna waa ka soo raynayaa meelaha qaarkood oo ka mid ah koonfurta/bartamaha Somaliya, taasoo fursad u siisay in dadku ka faa'iidaystaan waraabkii iyo dhulbeereedka, gaar ahaan shabeelada hoose.

Ilaa iyo dhawaadkii bilowga 2008, burcadbadeedu waxay qaadeen 144 weerar waxayna afduubeen 44 markab. Si kastaba ha ahaatee dhacdooyinka burcadbadeedu waa yaraatay seddexdii bilood ee u danbaysay, ka dib markii lagu qaaday duulaan joogto ah oo diyaarado iyo maraakiib caalami ah loo adeegsaday gacantana lagu dhigay in badan oo ka mid ah.

Ilaa iyo bishii Janaayo 2009, shaqaalaha gargaarka 7 ka mid ah waa la diley, 7na waa la afduubay. Guud ahaan 13 shaqaalaha gargaarka ah ayaa lagu haystaa somaliya. Nabadgelyada iyo xaalada nabadda ee shaqaalaha samafalka markasta way ka soo daraysey gobolada koonfurta iyo bartamaha Somaliya halkaasoo dadka dhibaataysani, 80% reer miyi ah iyo 52% reer magaal ah loo qoondeeyay in ku sugun yihiin. Socodkii iyo ka war hayntii Hay'adaha samafalka ee meelahaas wuu yaraaday maadaama Qaramada Midoobay lagu qasbay in ay ka baxaan Baay, Bakool iyo Shabeelada-dhexe Juun iyo Julaay 09 hanjabaado toos ah dartood, iyo boob hanti. Iyadoo loo eegayo xaaladaha cakiran ee colaadaha kacsan iyo dagaalada soo noqnoqonaya ee goboladaas, FSNAU waxay soo jeedinaysaa digniin hore in ay ka sii dari doonto xaalada cunt-yarida iyo xaalada nafaqo ee meelahaas, iyadoo xaaladda daraanshuhu ay ku xidhan tahay hadba sida ay noqdaan dagaaladaasu bilahan soo socda.

## *WAX-SOOSAARKA DALAGGA EE GUGA '09*

### *Wax-soosaarka Dalagga*


Wax-soorka Dalagga ee Guga 09 ee koonfurta Soomaaliya waxaa lagu qiyaasay 144,000MT, taas oo 60% tahay galey, 39% mesago iyo 1% bariis. Wax-soosaarkaasi waxuu 2% ka sareeyaa celceliska intii ay dagaalada sokeeye socdeen (1995-2008), 58% buu ka sareeyaa celceliska shan sano waana Guga labaad ee ugu sareeya soosaarka dalagga todobadii sanno ee ugu danbaysay (Jadwal X iyo Tirada Sumaada X). Badanaaba Dalagga Guga waxaa laga soosaray sadex gobol-Shabeelada hoose (51%), Baay (27%), iyo Jubbada dhexe (14%). Qodobada saameeyey sare u kaca waxsoosaarka waxa ka mid heerka roobka oo dhexdexaad ahaa(roobabka **Guga** iyo Roob shuux ah **Xagaaga**), habka waraabka oo hagagay, biyaha oo hagaagay meelaha wabiga u dhaw-dhaw Shabeelada hoose, iyo qiimaha dalaga gudaha oo sareeya. Taasi waxay keentay in ay korodho dhulka la beerayo shabeelada hoose (by 30%) iyo Jubbada dhexe (99%). Is barbar dhig, dalagga Guga 09 waa xumaaday Jubbada hoose, Hiiraan, Bakool iyo Gado sababtoo ah roobka oo soo daahay, yaraa si simana aan u baahsanayn. Soosaarka dalagga goboladaas waxaa lagu qiyaasay kaliya 10%- 26% of *Gu '09* (1995-2008)

Goboladda waqooyi galbeed ee Awdal, iyo Togdheer, dalagga la abuuray waxaa la qiyaasay in uu ka hooseyo celceliska sababtoo ah roobka guga oo caadi ka hoosaynta oon u baahsanayn si guud. Xilliga *Guga iyo Karanta* beerista dalagga waxaa lagu qiyasay mid aad uga hoosaysa toban sanno, una dhiganta 6,605MT ama 36% celceliska was soosaarka(1995-2008). Si kastaba ha ahaatee roobabaka *Karan* waxay ka bilowdeen Awdal iyo Degmooyinka Galbeed dabayaaqadii bisha todobaad 2009 waana socdaan, taas oo kordhinaysa koritaanka waxsoosaarka intii la qiyaasay markii la abuurayay, waxayna ku xiran tahay waxtarka roobabkaas bilaha soo socda.FSNAU iyo Daneeyayaalka kale waxay samayn doonaan baaris dalaga soo go,ay ka danbeeyey ee **Gu/ Karan** 09 dhamaadka Nofeembar iyo bilowga Diseembar 09.

**Shaxda 2: Qiyaasta waxsoosaarka firida ee Gu '09 ee koonfurta Soomalia**

| Regions | Gu 2009 Production in MT | | | Gu 2009 as % of Gu 2008 | Gu 2009 as % of Gu PWA (1995-2008) | Gu 2009 as % of 5 year average (2004-2008) |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | Maize | Sorghum | Total Cereal | | | |
| Bakol | 100 | 400 | 500 | 484% | 23% | 76% |
| Bay | 3,800 | 34,500 | 38,300 | 113% | 106% | 167% |
| Gedo | 1,300 | 100 | 1,400 | 148% | 26% | 67% |
| Hiran | 300 | 500 | 800 | 38% | 20% | 38% |
| Juba Dhexe (Middle) | 10,300 | 10,100 | 20,400 | 817% | 242% | 727% |
| Juba Hoose (Lower) | 600 | 0 | 600 | 12% | 10% | 29% |
| Shabelle Dhexe (Middle) | 5,200 | 1,800 | 7,000 | 129% | 44% | 50% |
| Shabelle Hoose (Lower) | 64,100 | 8,300 | 72,400 | 218% | 118% | 170% |
| **Gu 2009 Total** | **85,700** | **55,700** | **141,400** | **170%** | **102%** | **158%** |

**Jaantuska 3: Isbeddellada Soosaarka Dalagga Deyrta (1995-2008) - Gobollada Koonfurta**






*Good Sorghum Crop. Finka Weer, Sakow, M. Juba, July '09*

### *Wax-soosaarka Dalagga ee xilliga caadiga ah ka baxsan*

Roobab xagaaga oo qayrul caadi ah ayaa ka da'ay Juun ilaa Agoosto 09 gobolka Jubbooyinka,gaar ahaanJubda hoose, abuurayna fursado ee soosaarkiisa dalagga xilliga aan caadiga ahayn. Qiyaasta abuurka dalaga aan caadiga ahayn waxaa lagu qiyaasay 14,000MT Galay ah (89% ka timid Jubbada hoose), 2,00MT sisin (65% ka timid Jubbada hoose) iyo 800MT digir (83% ka timidjubbada hoose). Qiyaasta mesagada xilliga aan caadiga ahayn ee soo go'aysa waxay u dhigantaa 10% ee **Gu 09** soosaarka delega guud. Marka la isku daro **Guga** 09 iyo qiyaasta soosaarka dalagga, marka lagu daro Bariiska, waxaa la qiyaasay 157,900MT. FSNAU iyo Daneeyayaashu waxay samaynayaan baaris Sebtambar 2009, markuu dhamaado xilliga dalagga aan caadiga ahayn si loo qiyaaso waxsoosaarka.

### *Waxsoosaarka Sanadle iyo Badeecadaha*


Gugan lagu jiro waa kii afraad ee ugu sareeya todobadii sanno ee ugu danbaysay waxyna ka badan tahay guud ahaan wasoosaarka sannadka (Gu iyo Deyr) labadii sanno ee ugu danbaysay (jaantuska XX).Marka la isku geeyo waxsoosaarka Gu,ga 09 iyo qiyaasta waxsoosaarka dalagga xilliga aan caadiga ahayn waxaa lagu qiyaasaa 158,000MT, taasoo ah 67% delega sannadka PWA. FSNAU Baarista badeecada delega ee qoysaska shabeelada hoose, jubbada dhexe iyo gobolada Baay waxay dhamaanayaan 7-8 bilood, laga bilaabo juun 09. Helida badeecada delega goboladaas waa isku darka xilligii hore waxsoosaarka delega oo fiicnaa iyo waxsoosaarka delega aan cadiga ahyn oo ficnaa shabeelada hoose (Gu,08) iyo jubbada dhexe (kuli Gu,08 iyoDeyr 08/09).

### *Delega libka*


beeraha

Dalagga iibka, ama dalagga loo beero si loo gado bedelkii lagu noolaan alahaa, waa khayraad muhiim u ah meelaha miyiga ee wabiyada iyo beero iyo xoolo dhaqatada.. Dalaggaas iibka waxaa ka mid ah sisinta, qudaarta, furuudka, digirta, lowska, mooska, qajaar, tamaato, salar(ansalaato), basal, iyo balka/caws xoolaha la siiyo. Markaan sheegno muhiimada dalagga iibka, FSNAU waxay bilowday in qiyaasto wax soosarka dalaggaas iibka saddexmeelood oo wabi ah iyo meelo iyo beero xoolo dhaqato ah (Baay,Shabeelada hoose, iyo Jubbada dhexe). *Gu '*09 waxsoosarka delega iibka ee sadexdaas gobol waxa lagu qiyaasay 13,000MT, taasoo 46% ay tahay digir, 38% sisin iyo 15% lows. Ilaa iyo 38% waxay ka yimaadeen Baay, 32% shabeelada hoose iyo 23% Jubbada dhexe. Taa waxaa dheer, ilaa 3,000MT oo ah sisin soo la goosan doono xilliga aan caadi ahayn iyo waxsoosarka digirta oo laga sugaayo Jubbada hoose iyo Jubbada dhexe bisha sebtembar 2009.

**Jaantuska 4: Isbeddellada Soosaarka Dalagga ee Sannadkii (1995 - 2008) - Gobollada Koonfurta**





**Jaantuska 5: Isbeddellada Qiimaha Dalagga ee Heer Gobol (ShSo)**




### *Qiimaha Dalagga Gudaha Iyo awood iibsiga*


Qiimaha galayda iyo mesagada waxay hoos u dhaceen 50-60% waqtigii Julaay 08-Julaay 09, laakiin wali waa ka sareeyaa100-200% marka loo eego xilli dheer ama celcelika shan sano (Jaantuska XX). Julaay 2009, qiimihii ugu hooseeyay ee galay yo mesago ayaa la qoray shabeelada hoose iyo Jubbada dhexe (4,000/kg Qoryoolay iyo 5,000/kg Bu,aale), meelaha qiimaha mesagadu ugu hooseeyo waa Hiiraan (4,000/kg) iyo suuqyada waawayn ee dhulka mesagada (5,000-6,000/kg) Qiimaha masagada iyo galayduba waxaa la filayaa in ay sii dhacaan bilaha soosocda shabeelada hoose, Baay iyo gobolada Jubbooyinka. Maadaama ay mirihii soo go'ay ay galeen suuqaqa waawayn Agoosto-Sebteembar'09. Sida kale, qiimaha dalagga waxaa la filayaa in uu kordho gobolada kale sababtoo ah waxtarxumo roobabka Gu,ga 09, qasku yimid dhaqdhaqaaqqa suuqyada iyo xanibaadaha isu gudub la,aanta gobolada ooy keentay colaaduhu. FSNAU waxay si hoose u baari doontaa delega iyo qiimaha sida looga helo suuqyada waawayn bilaha soo socda.

**Jaantuska 6: Awooda iibsiga ee G. Juba iswaydaarsiga shaqo iyo Gelley**




Awood iibsiga iyo shaqada waa hagaagay 12kii bilood ee la soo dhaafay gobolada oo dhan.. Awood iibsiguna ka koreeyaa celceliska 5 sanno gobollada Bakool, Gedo, Hiiraan iyo shabeelooyinka, waqooyiguna waa la mid ama waa ka hooseeyaa. Hagaagaasi waxuu ka yimid qiimaha dallagga oo hoos u dhacay iyo mushaarka shaqada oo sare u kacay. Awood iibsigu ugu sareeya, oo ah 22-23kg/maalintiiba shaqada, waxaa laga qoray Jubbada dhexe iyo Hiiraan sababtoo ah mushaarka oo sareeya iyo qiimaha dallagga gudaha oo hooseeya (Galay 5,000 So,Sh iyos orghum 4,000 So Sh Julaay 09) ilaa iyo bartamihii-2008. Fursada shaqo ee gobolada shabeele, Jubba iyo Bakool waa hagaagtay iyadoo dad shaqeeya la raadinayo Guga 09 iyo beeraha xilliga caadiga aan ahayn la beero gobolka jubba (Jaantuska XX).

**Jaantuska 7: Isbeddellada Dalagga Ganacsiga Dibedda Looga Keeno (2005 - 2008)**




### *Tusmada Dheelitiranka firidda*


Isu dheeli tirka miraha sanadka xilliga Abriil 2009-May 2010 waxaa lagu qiyaasay marka lagu daro **Gugaan 09** waxsoosarka delega, Gu/Karan qiyaasta beerista delega ee galbeedka waqooyi, qiyaasta xilliga aan caadiga ahayn Gu 09 iyo celceliska waxsoosaarka delega Dayrta 09/10. Waa la qiyaasta badeecada soo dagaysa ayadoo la istcmaalayo celceliska saddex sanno laga bilaabo 2006-08. Badeecada cuntada ah ee gargaarka ee Abriil 09 waa lagu daray iyo sidoo kale cuntada gargaarka ee taransidka iyo tan soo socota. Guud ahaan dheelitirka delega waxuu muujinayaa tiro saa,id ah 65,000MT ilaa isdhin 45,000MT, waxay ku xiran tahay qaabka ganacsiga xuduudka. Helitaanka delega gudaha waxaa la filayaa in uu u dhawaado caadi roobka Guga oo fiicnaa awgeed iyo waxsoosaarka oon caadiga ahayn iyo Deyrta 09/10 oo fiican oo soo hormartay. Delega ganacsiga ee la soo dejiyo inta u dhaxaysa Jan-Julaay 09 (418,000MT) waa ka sareysay wadarta guud eee 2008 delega la soo degiyaya (352,000MT) (Jaantuska XX).

## XOOLAHA

### *Xaalada Daaqa iyo Guurguurka Xoolaha*

Xaaladda daaqa iyo deegaantu ee dhul daaqsimeedada ugu muhiimsan waay liidataa sababtoo ah roobabkii Guga oo si laxaad leh uga hoos maray sidii caadiga ahayd (Khariidada X). Tani waa xiligii shanaad ee si xidhiidh ah ay roobabku u xumaadeen meelaha abaaruhu aad wax u yeeleen ee Hiiraan, Galgaduud iyo Mudug. Dhanka Gobolada waqooyi, waa markii labaad iyo sadexaad oo xirrir ah oo roobabku ay ka hooseyaan caadi, iyadoo dhammaan Gobolada roobku liito waxaa ugu sii daran dhul daaqsimeedada muhiimka ah Sool, Hawd, Nugaal iyo Golis/Guban iyo dhul beeratada ay ka mid yihiin Togdheer, Awdal iyo W/Galbeed.

**Khariidadda 4: Xaaladaha Daaqa iyo Guuritaanka Xoolaha ee Soomaaliya, Bisha 7aad ee 2009**




Waxa laga soo qaatay:: FSNAU, 1aad 2009

Gobolada koonfurta caws iyo caleenba daaq ahaan meelaha ay gabaabsiga tahay waxaa ka mid ah; Shabeelada dhexe, Bakool, Gedo iyo qaybo ka mid ah Jubada hoose. Qaybo badan oo qoysaska xoolalayda ayaa mar hore bilaabay in ay u hayaamaan gobolada deriska ee Somalia, iyo sidoo kale kililka shanaad ee Etoobiya. Biyo yari ba'an baa ka jirta dhulka intiisa badan. Gobolada dhexe dhamman berkadaha, biyo-qabatinada iyo ceelasha gacan waraabka ah intooda badan way qalalan yihiin, gobolada waqooyi meelo badan waxaa ka jira biyo dhaan muddo dheer socday waana socon doonaa. Roobabka xaa-gaayada ee koonfurta ka da'ay iyo kuwa karanta ee galbeedka buuraha Golis ee gobolada waqooyiga si kastaba ha ahaatee, waxaa hagaagay mugii biyaha togaga, meelaha biyo qabatinka iyo ceelasha aan biri-qotayga ahayn isla markaan waxaa kaloo hagaagay xaaladda deegaanta iyo daaqa.

Waxaa dhacay hayaamo xad-dhaaf ah oo hafiyey qaybo badan oo dhul daaqsimeed roobab heleen ah ee wadanka Soomaaliya (Khariidada X). Geediga amase guurguurka caadiga ahi sidaa uma badnayn 6dii bilood ee hore ee sanadkan 2009, hayeeshee waxaad geediga noocaas ah ku arki kartaa afar gobol oo koonfur ah iyo meelo xadidan oo ay ka mid yihiin gobolada Bar iyo Awdal ee waqooyi oo hoglo heleen. Hayaamadan gargudubka ah iyo geedigan badan ee ku habqamayey meelihii roobabku heleen waxay dedejiyeen in biyihii iyo daaqiiba dhaqso u yaraadaan iyadoo ay dhulka intiisa badanina abaar ahayd.

### *Xaalada Muuqaalka Jidhka iyo Koritaanka tirada xoolaha*

Guud ahaan xaaladaha daaqa iyo biyaha ee ka sii darayaa waxay keeneen in muqaalka iyo manfaaciga xooluhuhu aad u sii xumaado ee Gobolada abaarta darani ku habsatay ee Galgaduud, Mudug, Hiiraaan, Bakool iyo shabeelada dhexe iyo meelaha roobku is dhimay ee Gedo, Koofurta Nugaal, Sool, Sanaag, Togdheer iyo Hawdka waqooyi galbeed. Afartaas xilli ee abaartu isku xigtay haba yaratee ma jirin geel iyo rimay ama dhalay siday u badan yihiin meelahaas abaartu haleeshay. Dhalida adhirigu (ido iyo riyaba) aad buu u hooseeyaa ama maba jiro oo waxba ma dhalin ee Gobolada dhexe sida Galgaduud, Mudug iyo Hiiraan. laakiin Dhalida adhigu waa hoos ilaa dhexdhexaad meelaha roobku yaryaha ee Bakool, Sanaag iyo shabeelada dhexe. Sidaas lidkeeda; iyadoo ay hagaagtay xaalada daaqa iyo biyah ee meelaha roobabka wanaagsan heleen sida galbeedka Golis/Guban ee Awdal iyo W/Galbeed, Bari iyo Shabeelada hoose, Baay iyo gobolada jubooyinka xaalada muqaalka xooluhu (jidhka) waa celcelis ama ka fiican. Meelahan dhaliinka geelu waa yaraa ama ma jiro sababtoo ah dayrtii(08/09) dhaweyd buu si dhexdhexaad ama aad ah u rimay, halka dhaliinka lo'du uu dhex-dhexaad ka yahay Jubba, Baay iyo shabeelada hoose. Waqooyi Bari iyo weliba gobolada Jubba, Baay iyo Shabeelad hoose dhallinka adhigu (arigu) waa dhexdhexaad, halka waqooyi galbeed dhallinka adhigu waa dhexdhexaad ilaa sare isla markaasna heerka rimayguna waa dhexdhexaad.

Hab Qiyaaseedka FSNAU ay u isticmaasho ogaanshaha isbedelada tirada xoolaha ee xoola dhaqatada Soomaaliya Gugan 2009 waxuu muu-jinayaa guud ahaan in ay hoos u dhacday tirade xooluhu marka loo eego dhamaadkii xilligii Deyrta '08/09. Goobaha ay abaartu saamaysay ee gobolada dhexe, oo shan xilli ay roobabku ka xumaadeen , waxay keentay in tirade xoolahooda hoos u dhacii ugu xumaa ku yimaado khaasantan lo,da iyo Idaha/riyaha. Ilaa iyo Janawari '09, meelaha xoolo dhaqatada iyo xoolo iyo beero dhaqatada ee Gobolada Hiiraan, Shabeelada dhexe, Bakool iyo Sool tiradu geelu waa ay sii yaranaysaa, inkastoo ay dhaamaan Gobolada Badhtamaha Soomaaliya. Lo,da iyo Adhiga (Ido & riyo) ayey abaartu aad u waxyeelaysay. Sababtuna waa daaqa iyo biyaha oo aad u xumaaday taas oo keentay in tirade dhimashada xooluhu ay badataan, sidoo kale tirade xoolaha la iibinayo oo iyana badatay si loogu daboolo qiimaha biyaha iyo cuntada oo sii kordhaya.


Waxaa la mid ah, meelaha roobku seejey ama uu aadka ugu yaraa e ay ka midka yihiin gudaha koonfurta iyo xoolalayda Daawa ee Gedo iyo Jubba, Bariga Golis/Guban ee waqooyi waxay tusaysaa isbebedel hoos u dhac tirade xoolaha in kastoo heerka Qiyaasta Haysashada aysan weli hoos uga dhicin ee ay ku dhow yihiin. Hawd iyo Nugaal tirada haysashada geelu heerka caadiga ah weli way ka sareysaa, si kastaba ha ahaatee, Haysashada tirade Idaha/riyaha hada heerka caadiga ah waa ka hoosaysaa. Xoola dhaqatada dhulka taaga ah ee Sool Idaha/riyaha tiradoodu aad bay u yaraadeen wayna ka hoos mareen heerkii tirada haysashada ee caadiga ahayd. Gobolada waqooyi bari iyo meelaha xoolalayda ee gudaha koonfurta ee gobolada jubba iyo Gedo tirade xooluhu hoos bay u dhacday waxayna u dhaw yihiin heerka caadiga ah. Lo,da gobolada Gedo iyo Jubba waa yaraatay dadka xoolaha yar caadiga way ka hoos mareen. Guud ahaan ma jiraan cuduro halista ah ee sida xoogga leh u faafa. Hase

yeeshee, waxaa jira dhacdooyin la xiriira sambab, furuq (CCPP, small box) oo laga soo sheegay gobolada ay abaartu saamaysay. Cudurada caadiga (sida cudurada ka dhasha dulinka/shillinta, cayaanka xoolaha dushooda ku nool iyo gooryaanada uur-ku-jirta xoolaha ku nool ayaa si baahsan looga soo sheegay badi gobolada.


***Qiimaha xoolaha iyo Awooda Wax libsiga ee Xoola-dhaqatada***

Guud ahaan, qiimaha geela iyo Adhiga si tartiib ah ayuu u kordhayay tan iyo bishii Nofeembar'08. Marbaa qiimuhu hoos u dhacay xilligii Juun '09, laakiin hadana wuu kordhay Julaay '09 waxuuna ka sare-eyay celceliska 5 sanno (2003-2007). Qiimaha oo kaca guud ahaan soomaliya waa isbebedelka dhaqaale wayn (xitaa waxaa laga dareemi karaa qiimaha mushaharka) taas oo ka jawaabaysa cadaadiska sicir bararka sannadadii 2008 oo dhan oo ay wehelisay qiima dhac shilinka Soomaliga (So sh). Qodobo kale oo sahlay in qiimuhu kordho waa hoos u dhaca xoolihii gadmi karay abaaro dhulkii muhiimka ahaa ee xoolalayda ku habsaday iyo ramadaanka oo xoolaha aad loo isticmaalo. Celceliska Julaay ;09 ariga dhoofka waqooyi bari, waqooyi galbeed iyo gobolada dhexe waa 19%-49% oo ka sareysa marka loo eego Julaay '08. Taa lidigeeda, qiimaha lo'du waa dhacay lixdii bilood ee u horaysay 2009, laa 11%-15%, dhulka masagadu ka baxdo iyo jubooyinka. (Jaantuska X) si kastaba ha ahaatee, taasi waa ay ka saraysaa celceliska shan sanno ( ilaa 77% dhulka masagada iyo 80% jubooyinka). Si kastaba ha ahaatee, qoysaska danyarta ah iyo inta badan kuwa dhexdhexaadka ah meelaha abaaruhu wax yeeleen iyo meelaha roobku ku yaraaday gugan ee Galgaduud, Mudug, Hiiraan, Shabeelada dhexe, Bakool, iyo Sanaag kama faa,iidaysan karaan qiimo kororkaas sababtoo ah ma haystaan xoolo suuqa lageeyo oo iibsami kara.

**Jaantuska 8: Isbeddellada Qiimaha Lo'da Dibaaxa ah ee Heer Gobol (ShSo/ShSl))**




**Jaantuska 9: Isbeddellada Qiimaha Rida Daabaxa ah ee Heer Gobol**





Qiimaha xoolaha ee sida wayn u kordhay iyo qiimaha delega ee sida wayn hoos ugu dhacay dartood, awooda wax iibsiga ee xoolo-dhaqatadu oo lagu qiyaasayo iswaydaarsiga ganacsiga ee ka dhaxeeya xoolaha iyo dalagga, si wayn ayuu u kordhay dhamaan gobolada (Jaantuska 9 iyo 10), marka laga reebo gobolada jubooyinka. Ilaa iyo Janawari '09 heerkii ugu sareeyay ee kororka ee iswaydaarsiga ganacsiga ariga/bariis, waxay u dhigantaa 90%, waxaana laga ogaaday gobolada waqooyi bari. Iswaydaarsiga ganacsiga TOT aad buu u kordhay marka loo eego Julaay '08, ilaa 95%-22%, gobolada bariga, waqooyi bari iyo gobolada dhexe.

***Dhoofinta Xoolaha***

Dhulka abaarta ah ee waqooyi bari ee Kenya waxay celiyeen lo'dii ganacsiga ee ka soo gudbaysay xuduuda ee ka imaanaysay Somaliya, maadama qiimaha lo'da ee suuqa xoolaha Garissa uu hoos u dhacay xoolo badan oo ka yimi Kenya oo u socda Somaliya awgeed. Si kastaba ha ahaatee, Gobolada dhexe iyo kuwa waqooyi, muga xoolaha la dhoofiyay Jan-Jul '09 (1,055,183 neef) taas oo ka badan 32% isla xilaagaa sanadkii hore. Muga xoolaha la dhoofinayo waxa la filaya in ay sii korodho Ramadaanka iyo xajj. Dadka badankii ma haysataan xoolo suuq leh, si kastaba ha ahaatee waa ku yar yihiin dhulka abaaruhu saameeyeen ee Galgaduud, Mudug, Sool iyo Hiraan.

**Jaantuska 10 Isbeddellada Heerka Gobol ee Iswaydaarsiga Ganacsiga, Dalag Lagu Beddelanyo Rida Dibaaxa ah**




Shan meelood oo xoolaha lagu gawraco wadanka laba kaliya, Galkacyo iyo Burco baa shaqaynaysa si toos ah, halka meelaha xoolaha lagu gawraco ee Muqdishu iyo Baladweyne ay qasmeen nabadgelyo daro awgeed iyo gaadiidka diyaaradaha oon deganayn. Tusaale ahaan, Beledweyne dhoofintu waxay bilaabanaysaa Nofembar '08 kadib xanibaad dheer 22 bilood ilaa iyo Janawary '07. Waqtiga Jan-July. '09 (24,328) hilbo baa laga dhoofshay Beledweyne. Xiligaa hilbaha laga dhoofshay waa (31,497) iyo Burco (46,240) waxay hoos u dhaceen ilaa 36% iyo 52% siday u kala horeeyaan marka loo eego isla waqtigaa sannadii la soo dhaafay taas oo ay keentay tartan suuqyada carabta (Gulf), rabitaanka oo hooseeya iyo xoolo qiimo leh oo aan jirin.

xoolaha

## SUUQYADA

Shilinka Soomaliga (SoSh) si fiican buu qiimo u yeeshay intii u dhexaysay Oktobar '08 iyo Feb. '09 (ilaa 10-19%) suuqyada badankooda. Si kastaba ha ahaatee waxaa qiimihii lacagtu hadana hoos u dhacay inta u dhaxaysay Maajo-Agoosto '09 (jaantuska X). Ilaa Julay '09, qiimaha SoSh wuxuu ku socday isku mid ah ilaa Jan '09 laakiin weli waa ka sareeyaa July.'08 (ilaa 10% celcelis). Heerka qiima dhaca shilinka soomaligu wuxuu si muuqata uga hooseeyaa marka loo barbardhigo celceliska 5 sanno (90-100%).

Shillinka Somaliland (SlSh) xataa waa qiimo jabay January-July '09 (9%) ka dib sanado badan oo uu qiima deganaa marka loo fiirsho qiimaha Dollarka. Waqtigii July '09, SlSh suuqa hargeysa gudahiisa waxaa loga ganacsanayay ilaa 6,950 SlSh/USD.


Qimaha badeecadaha dibada laga keenaa Jan-Jun. '09 hoos bay u sii socotay, haddana qiimihii sare ayuu u kacay mar labaad Maajo '09, iyaddoo la jaanqaadaysa qiima dhaca cusub ee shillinka Soomaaliga ku yimid. Si kastaba ha ahaatee, qiimahoodii waa ka hooseeyaan waqtigii 2008. Waqtiga July '09 qiimaha cuntooyinka la soo dajiyo kuwa ugu waawayn, marka laga reebo sokorta, waa hoosaysaa suuqyada badankooda marka loo fiirsho sanadku markuu bilaabanayay. Tusaale ahaan; qiimaha bariiska suuqaqa Gobolada dhexe wuxuu hoos u dhacay ilaa 28% (Jaantuska xx). Qiimuhu waa 62-122% ka kor heerka waqtiga dheer ee shanta sanno.

Isbebedelka qiimaha bariiska tafaariiqda loo gado ee Muqdisho wuxuu la socdaa ama waafaqsan yahay isbebedelks qiimaha guud ee caalamiga, si kastaba ha ahaatee, faraqa u dhexeeya labada qiime celcelis ahaan waa 0.41 Kg/USD. Taasi waxay u dhawdahay koror ilaa 25% marka loo fiirsho kala duwanaanshaha celcelis ee qiimaha markuu kor aad u kacay Maajo 2008 (Jaantuska xx). Kororka kala duwanaanshahan waxaa sabab u ah kororka qiimaha rarka ee markaabkiibta iyo qodobo kale oo dhaqaale wayn ah.


### Kharashka Nolosha ee Saboolka Reer magaalka iyo halbeega qiimaha macmiilka (HQM=CPI)

Xilligan, celceliska HQM ee meelaha laga isticmaalo SoSh waa 43% ka hoos marka loo barbar dhigo Juun '08, si kastaba ha ahaatee, si wayn bay uga sareysaa sidii caadiga ahayd (82% ka sare kolka loo eego Maaj '07) (Jaantuska x). Yaraanta kharashka qiimaha ugu yar ee danbiisha (CMB) waxaa badi loo aanaynayaa in keenay hoos u dhaca qiimaha miraha firiga ah (masago, Gelley, iwm) oo ay saboolka reer magaalku qayb ahaan (50-60%) ka isticmaalaan. Qiima dhaca badeecooyinka kale waxay soo kordhiyeen in ay hoos u dhacdo qiimaha kharashka ugu yare e dambiisha. Ilaa iyo Maaj '09, kharashka ugu yar ee dambiishu/saladdu si aad ah ayuu u yaraaday gobolada badhtamaha ityo koonfurta Soomaaliya, 11% iyo 4%, say u kala horeeyaan. Gobolada waqooyi Bari iyo waqooyi Galbeed, si kasta ha ahaatee, HQM waxuu tilmaamayaa wax yar oo koritaan ah xilliga Maaj-Juun '09, 13% iyo 2%, siday u kala horeeyaa. Meelaha shillinka somalilaandka laga isticmaalo, HQM waxuu u dhawyahay heerka xogsaleedkii la hayey (baseline Maaj '07), taas oo tilmaamaysa in saamaynta sicirbararku ay sahlan tahay.


**Jaantuska 11: Isbeddelladaha Heerarka Sarrifka Lacagta – SHSO iyo SHSL oo lagu beddelanyo Doolarka Maraykanka**




**Jaantusta 12: Shabeellooyinka Isbeddellada Qiimaha Badeecadda Dibedda laga Keeno oo loo Eegayo Heerka Sarrifka Lacagta**





**Jaantuska 13: Qiimaha Bariisa ee Muqdisho oo Loo Eegayo Qiimaha Caalamiga ah Bishii 1aad ee '07 ilaa Bishii 12aad ee '08**




Source: FAO Statistics and FSNAU Market Price Monitoring System, 2009.

**Jaantuska 14: Isbeddelladaha Heerka Gobol ee CPI**



## GUUDMAR XAALADA NAFAQADA


Falaqayn isku isku dhafan oo ku saabsan macluumaadka nafaqada ee la soo ururiyay laga bilaabo Janaayo ilaa Luulyo 2009 waxay muujinaysaa xaalad nafaqo oo kala duwani in ay ka jirto dalka (Jaantusyada 5 iyo 6). Colaada Muqdisho ka jirta waxay sababtay barakaca dadweynaha, abaaraha ka sii daray ee ka jira gobolada dhexe, iyo qaybo ka mid ah koonfurta , hadana ku sii baahaysa meelo ka mid ah gobolada Waqooyi Galbeed , iyo sare u kaca ku yimi qiimaha ba-deecadaha. Falanqaymaha hadana waxay tilmaamayaan in Heerka cudurada oo aad u sareeya ay tahay arimaha ugu horeeya hadda , cuduro dilaacay, helitaanka adeegyada aasaasiga ah oo aad u hooseeya, habka xanaanaynta ciyaalka yar yar oo liidata ayaa sii xumaynaysa xaaladda nafaqadaro xumo ee mudada soo jirtey marka laga hadlayo dadka Somaliyeed. Arrimaha ugu waaweyn ee keenay nafaqadaradaan raagtey waa helitaan la'aan biyo nadiifa iyo adeeg nadaafadeed (suuliyo), labadaas ariimoodba waxay ku keeneen shuban xad-dhaaf ah ilmaha yaryar. Helitaanka biyo nadiif ah Somaliya waxaa lagu qiyaasay 11.3% iyadoo 12.6% keliyana ay suuliyo haystaan, Meelo badan oo wadanka ak mid ah, dadku waxay ku nool yihiin wax u dhigma hal dhalo oo biyo wasakhaysan ah maalintii, banaankana waa ku saxaroodaan. Hawlaha wax lagaga qabanayo Biyaha sanadkii 2009 aad bay u liiteen dhaqaalaha lagu baxshay, marka loo barbar dhigo qaybaha kale sida cuntada iyo caafimaadka, walina biyaxumada iyo nadafad-darada waa waxyaabaha ugu badan ee keena cudurada la xiriira xaaladaha degdega ah ee nafaqodaradda. xaladaha caafimaad iyo nafaqo ee ka sii darayaa waxay xaqiijinaysaa baahida ay biyaha iyo nadaafada dadka ay saameeyeen abaaraha, colaadaha iyo barakaca. Ilaa la helo dadaalo wax lagaga qabanay biyaha iyo nadaafada Soomaaliya aad ayay u yaryiihiin horumarka laga gaari akro xaga caafimaadka iyo nafaqada.

FSNAU iyo la hawlanayaasheedu waxay sameeyeen 33 sahan oo xaga nafaqada ah sanadkaan 2009 inta badan sahamadaas waxaa la isticimaalay/la tixraacay habka koritaanka WHO (WHO growth standard), 6 sahan heerkooda nafaqadu wuu ka hooseeyey 15% 11 Sahana wuxuu heerkooda nafaqadu u dhexeeyey 15 – 20% , halka 16 sahan ee kale ay ka sareeyeen 20%. (jaantuska 15) dhexyaalka heerka Nafaqadarada guud ee 33daas sahan waxay ahayd 19% , halka 17% ay ahayd marka la barbar dhigo sahamadii kale ee ugu dambeeyey. Meelo badan wali waa sareeyaa heerka nafaqadarada halista ah, iyadoo dhexyaalka nafaqadarada halista ahna uu yahay 4.5% 33 sahan (marka la isticmaalo heerka koritaankaWHO) ), taasi waxay fasiraysaa qiyaastii in 285,000 cunug ay nafaqadaro hayso, 70,000 oo ka mid ahna ay nafaqo daro halis ahi hayso, kuwaas oo u kala taagan in uu nafaqo daran yahay 1 ka mid ah 5tii cunugba iyo in nafaqo daro halis ahi hayso 1 ka mid ah 20 cunugba ciyaalka ka yar 5 sano ee ku nool Somalia oo dhan. Si kastaba ha ahaatee, heerka dhimashada Guud iyo tan caruurta shanta sano ka yariba way ka hooseeyaan weli heerarka xaladaha degdega ah oo ah 2 (guud ahaan) iyo 4 (caruurta) dhimasha maalintiiba 10,000 oo qofba, waxaase jira xaalad heer taxa-dar u baahan meelaha qaaarkood (CMR oo 1-2/10,000 maalintii iyo U5MR oo 2-4/10,000 maalin) sida ka soo baxday 4 sahan (Beer-xoololyada.,shabeele, beero-xoolalayda Jubba iyo beeralayda (webiga) iyo Beero-xoolalayda Gedo). 70% ciyaalkaasi waxay joogaan koonfur iyo gobolada dhexe, meelaha ay wax yeelaysay colaadu gargaarka bani aadana uu ku yar yahay. Natiijooyinkii ugu muhiimsanaa ee sahamadaas waxaan ku soo koobnay hoos, iyadoo gobol-gobol iyo habnolololeed-habnololeed si faahfahsan loogu soo bandhigi doono buug ka hadlaayay Nafaqada Soomaaliya deyr 09 ka dib kaas oo soo bixi doona Sebtembar 2009.

***Gobolada Koonfur iyo Bartamaha***

Jiritaanka ***Heer Khatar ah*** iyo ***Heer aad khatar u ah*** ee xaalada nafaqo ee koonfurta iyo bartamaha Somaliya wxay sii bidhaminaysaa saamayntii sanadihii colaadaha iyo awooda dadku ay u leeyihiin in sida ay dhibaatooyinka ula tacaalaan. Iyadoo aysan jirin aadeegyo caafimaad ku haboon , ciyaalku waxay bilaabeen in ku u nooladaan heer nuglaan ah, iyadoo ay u weheliso cudurada badnaaba ku dhaca caruurta, sida cudurada neefma-reenada iyo shubanada , waxay noqon karaan dilaa. La'aanta biyo nadiif ah iyo fayadhawr wanaagsan ee baahsani waxay siyaadinaysaa khatarta shubanka, iyadoo uu hadaba aad u badan yahay shubanku . Cuntooyinka ugu badan ee hadda ciyaalka lagu quudiyaa waa firaley iyo saliid, taas oo ay ka maqan yihiin nafaqeeyayaalka yar-yar (fitamiinada iyo macaadinata) iyo Borotiinka oo muhiim u ah koriimada caruurta . Waqtiyada dhibaatada, xitaa salida iyo firalaydu waa yar yihiin, taas oo siixumaynaysa xaaladda nafaqada keenaysana in u kor u sii kaco heerka macaluushu. Inkatoo heerka nafaqadarada ay sareeyso hadda wadankoo dhan, hagaasid sare oo 30% ayaa jirta gobolada koonfurta iyo bartamaha, marka loo eego 10% ee laga soo sheegay waqooyi galbeed, taasi waxay ku tusaysaa saamaynta fog ee Qalalaasaha. Iyadoo hawlaha samafalku sii yaraanayaan, saadaasha xaalada nafaqado waxay u muuqataa mid liidan doonta bilaha soo socda.

**Jaantuska 14: Xaaladda Nafaqada Soomaaliya oo La Qiyaasay, Bisha 4aad ee '09**




***Gobolada waqooyi***

Gobolada waqooyi galbeed, waxaa ka muuqda xaalado kala duwan iyadoo ay jirto dib u soo raysasho (kabasho) la taaban karo Galbeedka golis/guban taas hadda noqotay heerkeeda nafaqo daradu nid ***liidata*** halka ay horay uga hayd mid *Aad Khatar u ah*, waxyaabaha ka soo rayntaas keenay ayaa waxaa ka mid ah xoolo badan oo ku soo hayaamay, helitaanka caanaha oo siyaaday iyo kaalmada banii'aadanimo oo siyaaday. Heerka soo kabashadu wuu ka hooseeya sidaas dhinaca bari, iyadoo laga yaabo inay ugu wacan tahay heerka sugnaanta cuntada oo liita, iyo adeegyada kale ee bulshada oo

iyaguna yar. meelaha kale waxba iskama bedelin xaaladoodii nafaqo oo ahayd mid heerkeedu Liito *Deyrta '08/09,* si kastaba ha ahaa, Meelo cayiman ee laga walwalayo ayaa jira sida beero-xoolaleyda Galbeed iyo Koonfurta Togdheer, iyo Oogada Sool iyadoo ay u sii weheliso dhibato biyo la,aaneed iyo cudurka shubanka ayna sii sxumaatay heerka sugnaanta cuntadu. Marka la eego heerka tirada dad weynaha, xataa iyadoo ay nafaqo daro *Aad u khatar* ahi aysan ka jirin, 20% oo ciyaalka Soomaliyeed oo aad u nafaqodadaran joogaan Waqooyi galbeed, sidaa daradeed dadaalo wada jira ayaa loo baahan yahay si ay u helaan baahidooda.

Gobolada waqooyi bari, falanqaynta xaaladda nafaqo waxay tilmaamaysaa heerar kala duwan, in kastoo xaaladu xumaatay 6 bilood ka hor marka la barbar dhigo. Heer nafaqo daro oo ***Khatar ah*** ayaa laga soo sheegay bariga Golis, Karkaar iyo dooxada Nugaal halka heer nafaqo daro oo ***liita*** laga soo sheegay dhul-oogaadka Sool. Heerka nafaqo daro ee ***khatarta*** ah oo ka soo rayn waayey Hawdka iyo Caduunka waxay tilmaamaysaa xaalad walaac leh oo nafaqo daro oo ka jirta, una baahan in kor loo qaado wax ka qabashada baahidaas.


***Barakacayaasha (IDPs)***

Dadweynaha barakacayaashu waa kooxda ugu nugul nafaqadarada weli, xitaa meelaha nabadgelyada yar ka jirto ee gobolada waqooyi. Dhextaalka heerka guud ee nafaqo daradu waa 20%, kaas oo ka sareeye heerka uu marayo wadanka, dhextaalka heerka nafaqadarida halista ahina waa 4.8% waxaa kaloo barakacayaasha laga soo sheegay heerka hagaaska ee ugu sareeya 36%, si kastaba ha ahaatee waxaa kaloo iyadu mihuum ah in la sheego in heerka nafaqo daro ee Barakacayaasha Afgooye iyo Marka ay ka mid ahaayeen meelaha nafaqo daradoodu ugu hoosaysey sanadkaan 2009, taas oo lala xiriirin karo kaalmooyinka wax ku oolka ah ee mudada la soo waday, Taasi waxay tusaysaa xaalada nafaqo in ay hagaagi karto marka la helo xanaano tiro iyo tayo leh.




*Goob Barakacayaal Cusub Dhusamareb, Galgadud FSNAU, July '09*

**Khariidadda 5: Xaaladda Nafaqada Soomaaliya oo La Qiyaasay, Bisha 1aad ee '09**




**Khariidadda 6: Xaaladda Nafaqada Soomaaliya oo La Qiyaasay, Bisha 7aad ee '09**



# FALANQAYNTA ISKU DHAFKA SUGNAANTA CUNTADA


## MAGAALOOYIN

Tiro badan oo ah dadka sabolka reer ayaa weli la baax-aadegaya nolashooda, inkastoo ay hoos u dhaceen qiimaha cuntadu iyo korodhka mushaharka shaqadu. Ugu yaraan afarmeelood (23%) ee dadka magalooyinka guud ahaan u dhow 655,000 qof, ayaa waxay u baahan yihiin kaalmo bani aadan (Jaantuska 7). Tiradni hoos ayey uga yartahay tan Deyrtii'08/09 oo ahyd705,000 qof Dadka guud ahaan dhibaataysan ilaa 520,000 waxay ku jiraan **xaalad xun oo cuntada iyo Hab-nololeedka ah (XCHAX),** waxayna u baahan yihiin in laga caawiyo hab-nololeedkooda, halka 135.000 qof ay u baahan yihiin **Gurmad bani,aadanimo (GB),** ayagoo u baahan in laga taageero hab-nololeedkooda iyo badbaadin noloshooda


Cunto helida dadka saboolka ah ee magaalooyinka waa soo hagaagatay ilaa '08/09. Taas waxaa keenay qiimaha sii dhacaya ee badeecadaha la soodagiyo, iyo hagaaga fursadaha iyo qiimaha mushaarka. Taasi waxay kordhisay awooda wax gadasho qoysas sabool ah oo magalada jooga ee gobolada Shabeelada Hoose, Baay, iyo Jubba. Celceliska qimaha ugu yar e qarashka danbiisha (QYQD) iyo tilmamaha qiimaha macmiilka (CPI) waa uu yaraaday meelo badan oo magaalooyinka ka mid ah ilaa bishii 12aad ee 2008, qiimaha dalagga oo hoos u dhacday awgeed (arag *Qaybta suuqa*). Qiimaha ugu wayn waxaa uu hoos udhacy (MEB) waana gobolada koonfurta ilaa (26%) iyo bartamaha. Gobolada waqooyi qiimaha (MEB) hoos buu u dhacay ilaa iyo 22% waqooyi galbeed iyo kaliya 5% waqooyi bari.

Awood iibsiga firada iyo mushahaarka shaqada aad bay u saraysaa marka loo eego Jun iyo Dec. '08, laakiin wali waa ay ka hoosaysa heerka xilligii ka hooreeya qiimadhac shillinka (Bishii 3aad '07) ( Jaantuska 17). Hase ahaatee, lacagta ka soo gasha shaqada dadka saboolka ah ee magaalooyinka gobolada dhexe, iyo qaybo ka mid ah gobolada waqooyi waa hooseysaa, taas oo yaraysay awoodooda in ay daboolaaan qarashka ugu yar ee danbiisha. Guud ahaan heerka lacagta la xawilo ay helaan qoysaska reer magaalka ahi ooy xawilaad ahaan ku helaan, lacag cad, sadaqo iyo deyn, taas oo ka kooban nabadgelyada is deberkooda, ayna yaraatay Juun '09. Sababta ugu wayni waa dhibaatada sii socota qaybo badan oo wadanka ka mid ah, iyo sidoo kale dhibaatootinka dhaqaala xumada aduunka ee saamaysay lacagaha xawilaadaha imaanayay. Si kastaba ha ahaatee, inta u dhaxaysay Bishii 12 aad '08 iyo Juun '09, celceliska isdhmida qarasshka la isa siin jiray, deynta iyo xawilaadaha waxay udhigantaa ilaa 30-60%. Laga bilaabo Juun '09, xawiladaha ee loo gudbinayo saboolka reer magaalka wadanka oo dhan waxay dabooshaa 6-29 ee qiimaha QYD marka loo eego 15-35% oo ahaa bisha 12aad ee.2008.

**Khariidadda 7: Saadaasha Dadweynaha Magaalooyinka Bisha 7aad-Bisha 12aad ee '09**




**Jaantuska 15: Iswaydaarsiga Cumaal Shaqo iyo Dalag ee G. Dhexe, Koonfur iyo W. Bari**





Ka sokow hagaaga qiimaha cuntada iyo awooda wax iibsiga ee qaybo kala duwan ee wadanka yaa weli dad badan oo sabool ahi ku jiraan xaalad adag oo nololeed kana sii daraysaa. Abaarta sii dheeraanaysa gobolada dhexe iyo abaarta ka soo ifbaxaysa gobolada waqooyi ayaa sababtay dhaqdhaqaaqa xoolalayda cadhooday inay u wareegaan magaalooyinka kuna keenaan culeys dheeraad ah, iyadoo wax u dhimaysa isdabaridii iy qaabkii is caawinta bulshada ee saboolka magaalooyinka. Kormer deg deg ah oo laga sameyay magaalooyinka 48 xarumood oo laga helay macluumaadka cabirka gacanta ee ilmaha ka yar 5 sanno, cuntada qoysku qaato ee 24 kii saacadood, iyo qaabka isdabarida ay hagagsadeen marka loo eego xilli la mid ah kii 2008, labaduba waxay ku salaysan yihiin in dib loo xusuusto. Daraasad dhinaca nafaqada magaaloyinka oo la sameeyey feb'08 waxy muujinaysaa in ay la mid ahayd dhulka reer miyiga oo dhan dhinca habnololeedka, marka laga reebo Xuddun ee gobolka Sool ah iyo Gar'adag ee gobolka Sanaag ah halkaas oo xaaladu nafaqadu ugu xumayd. Marka loo eego xilligii *Deyrta* '08/09, xaladda nafaqo ee magaalooyinka way soo hagagtay qaybaha waqooyi ee Awdal (Galbeedka habnololeedka Golis ), galgaduud iyo gobolada mudug ( habnololeedka hawd), laakiin waa sii xumaatay ama way daganayd meelaha kale ee dalka.


## DHULKA MIYIGA AH

Falan qaynta cuntada ee k u salaysan hab-nololeedka iskud-hafan ee *Gu* '09 waxay muujinaysaa xiisad bani aadanimo oo xun oo soo food saartay 1,435,000 million oo qof oo dadka miyiga somaliya dega ah. Tirada dadka dhibaataysan waa kordheen ilaa iyo ka dib *Deyrta* '08/09 ilaa 18%. Tirada dadka ku jira **Gurmad bani aadanimo (GB)**, oo dhan 775,000, oo qof , aad ayay uga badan tahay tirade dadka ku jira **Xiisad cuntada iyo hab-nololeedka oo aad u xun (XCHAX)**, oo dhan 660,000. oo qof. Meelaha dadka dhibaataysan ugu badan yihiin waa Galgadud, Hiran, Mudug, Bakool, Middle Shabelle iyo Gedo. Goboladaas dadku waxay ku jiraan **XCHAX** iyo **GB** oo ku qiimaysan 50-87% guud ahaan tirade dadka miyiga. Wax yar oo ka soo rayn ah ayaa waxaa lagu arkay oo dhan 7-24% isdhimid tirada dadka dhibaatadu hayso ee reer miyiga Guban (Awdal), wabileyda shabeele (Shabeelada H, iyo Shabeelada DH), xoolalayda gudaha ee koonfurta iyo beero -xoolo dhaqatada koonfureed Shabeelada hoose), Bay-Bakool-Baar dheera beero iyo hab-nololeedka xoolo dhaqatada (Gedo) iyo wabiga (Jubada H. iyo DH). Cadaynta Qoondaynta Xaalada Cuntada ee isku jirta ee loo diyaariyay gobol kasta iyadoo ku salaysan hab nololeed waxaa laga helayaa Websaydka FSNAU.

Khariidadda 8: Saadaasha Dadweynaha Miyiga Bisha 7aad-Bisha 12aad ee '09




Jaantuska 18: Iswaydaarsiga Ganacsiga ee Gedo (Luuq), Rida Dibaaxa & Shaqo Lagu Beddelanyo dalag (Gallay)




### *Gedo*

Guud ahaan xaalada hubinta cuntadu waa sii xumaanaysaa gobolka Gedo, inkastoo ay jiraan meelo yar yar oo soo siicnaanaya gaar ahaan meelaha wabiga ee degmagda baardheere ee koonfur xigta. Ilaa iyo *Deyr* '08/09 tirada dadka ku jira **Gurmad Baniaadan (GB)** way korodhay oo waxay gaartay 35,000 oo qof iyadoo kor uga kacday 40,000, oo qof, iyadoo tirada daka ku jira **Xiisad Cuntada iyo hab-nololeedka ah oo aad u xun** (**XCHAX**) ay kor ugu kacday 60,000 oo qof ilaa 80,000 oo qof. Waxaa intaas dheer, waxaa jira 30,000 oo qof oo ah dadka saboolka ah ee magaalooyinka oo iminka ku jira **XCHAX** (TJaaantuska 1). Sii xumaanta xaalada waxaa keenay xilliyadii kale oo roob xumo jirtay, xoolaha oo aad loo isticmaalay iyo qiimihii xoolaha oo dhacay. Khariidada xalladda ee waqooyiga Gedo waxuu la 'la-babanayaa' sida meele '***Meel hab-nololeedku uu ku xiran yahay Deeqda Bani aadanimo'*** (Khariidada 8).

FSNAU waxay cadaynaysaa ku tiirsanaan sare oo kaalmo bani'aadanimo ee gobolka in ka badan muddo 15 sanadood ay sababtay in dadweynyhu ka leexdaan habnololeedkoodu oo ay ku tirsanaadaan kana dhursugaan gaar gaar bini'aadnimo ee degdegah. Xaaladda nafo ee dhulka miyiga waa midaa ugu sareysa somaliya oo soo jreen ah(>20% GAM) iyadoo ay ku jiraan habka cunto helista, hantida habnololeedka, habka isdeberidda oo dhammaantood geyeysiiyey bulsha gobolkan inay xaaladoodu ahaato mid u baahan gurmad degdeg ag iyo mid bini'adnimo had iyo jeer. Tani waxay cadaynaysaa waqti dheer oo lagu xirnaado kaalmo bani'aadan in ay abuurayso ku tiirsanaansho gacan dabadeed. Waxa habboon in la axadho siddi loo wajililhaa mushkillada ay reebtay ku tiirsanaanta caawimadu lana fuliyo waxqabad ka saaraa bulsha xaallada nolonol xumo iyo nafaqadarro ee ka jirta gobolkaas..

Guud ahaan xaalada sugnaanta cuntada hoos ayey u dhacday,ka dib markii xilli kale roobkii xumaaday,gaar ahaan dhinaca waqooyiga. Dhul daaqsimeedka iyo waxsoosaarka xoolaha waa ay hooseeyaan meelo badan oo gobolka ka mid ah, marka laga reebo meelo yar oo baardheera, Garbaharay iyo El-wak ka tirsan, halkaas oo daaqa iyo biyuhu wax yar soo hagaageen, roobabka oo u dhawaa caadi. Koonfurta El-wak,intii yarad ee daaqu hagaagay wax yar ka bacdi waa idlaaday sababtoo ah xoolo badan oo ku sooguuray (Kenya+Ethiopia). Herka dhalmada xoolaha iyo heista caanaha waa liitaa inta badan gobolka lama filayana inuu soo hagaago ila xilliga deyrta09/10. Hoos u dhaca tirda xooluhu way kala duwanyihiin , waxaana ugu liita lo'da, haynta xooluhu aad bay ugua hooseysaa xogsaleedka.(Baseline) iyadoo ay ugu wacac tahay xoolaha badan oo ku baxay cuntada, biyaha qaaliga ah iyo cuduro. Roob yaraanta dhulka beeraha waxay keentay in wax yari ka soo go'aan (26% Gu/PWA), wax soosaarka degmada Baardheere ayaa u dhigma 89% ,ee dalagga gobolka ee xilligan guga. Wax soosaarka dagallaga iibka siddoo kale aa buu ugu yaraa degmada.
Daqligii waa yaraday maadama iibinta dallagga, caanaha iyo xoolaha, shaqada uu yaraaday guna wacantahy hoos u dhac ku yimi, hawlha beeraha, dhismaha iyo ganacsiga dhulka tabaalaysan.Meelaha ka goonida ahi waa dhulka wabiga

ee baardhera halkaas oo galayda waxsoosaarkeeedii uu hagaagsa marka loo eego xiligii Gugii la soo dhaafay (*Gu* '08 iyo *Gu* '07). Qiimaha dalagga iyo xooluhu waa dhacay ilaa July '08 (ilaa 30% iyo 19%, siday ukala horeeyaan), Inkastoo labadooduba ay ka koreeyaan celceliska 5 sanno. Sidoo kale awooda wax gadashada waa ay hagaagtay ilaa iyo sannadkii hore, laakiin wali waa jilicsan tahay marka loo barbardhigo shan sanno xiriir ah. Ganacsi isku bebedelka ee ariga iyo dalagga waxaa lagu qiyaasay ilaa 50kg/neefkii, ayadoo ganacsi isku bebedelka shaqada iyo delega ay tahay 12kg/maalintii mushaar shaqo (Jaantuska 18). Si kastaba ha ahaatee, haysasha xoolaha ( gaar ahaan lo'da, idaha iyo riyaha) hoos bay u dhacday sababtoo ah xoolo badan baa la gaday cuntada, qiimaha biyaha sareeya iyo qaar u dhintay cuduro.

Falanqayn isku dhafka ah oo lagu sameeyay macluumaadka ka soo baxay qiimayntii nafaqada ee laga sameeyay Gedo xilligii *Guga* '09 waxuu tilmaamay in xaalad nafaqadaro oo ***Aad u xun*** ay ka jirto meelaha xoolalayda ah iyo wabiyada hab-nololeedkooda iyo xaalad nafaqo oo ***Xun*** hab-nololeedka beeraha iyo xoolaha. Taasi waxay muujisay dhibaato joogto ah meelaha xoolo dhaqatada iyo wabiyada iyo hagaga wax yar dadka beeraha iyo xoolaha ku nool laga bilaabo *Deytrta* '08/09. Xaalada nafaqo daro ee xun waxay qayb ka tahay jirada badan, cunto xumo kaladuwan, isticmaalka caanaha oo sii yaraanaya, ilma korinta oon xun iyo ula kac markasta la qasayo xarumaha hooyada iyo dhalaanka. Talaalku waa fiican yahay gobolka, si kasta ha ahaatee waa wax fiican oo qiima leh, iyo waxay la xiriirtaa maalmaha caafimaadka caruurta.

***Jubada Hoose iyo Dhexe***

Xiliyo badan oo hagaagsan oo isdaba socday laga bilaabo abaartii '05/06, xaalada hubinta cuntada ee dhulka xoolaaha ee koonfur-bari (lo,da) iyo dhulka beero iyo xoolo dhaqatada ah ee Jubba (galay iyo lo,o) iyo degmooyinka Afmadow iyo Badhaadhe ee Jubbada hoose waxay bilaabeen in ay xumaadaan. Taasna waxay sababtaysoo ifbax **Xiisad Cuntada Iyo Hab-nololeedka ah oo aad u Xun (XCHAX)**, dad lagu qiyaasay 15,000 qof oo sabool ah oo jooga dhulka beeraha-xoolaha iyo xoolaha lagu dhaqdo ee degmooynkaas. Isbarbardhiga, meelaha wabiga ee Jubbada hoose iyo Jubba dhexe waxaa ka jira soo hagaaga xaalada suguda cuntada, halkaasoo 21,000 qof (12,000 jubbada dhexe, 9,000 Jubbada hoose) markii hore loo aqoonsaday XCHAX *Deyrtii* '08/09, ayaa hada waxay yihiin X**ariiqa xadka ee hubinla,aanta cuntada (XHC)**. Taa waxaa dheer, dad lagu qiyaasay 30,000 oo reer magaal ah aya waxaa loo aqoonsaday **XCHAX** labada gobolba.



*Galley iyo Sinsin si fiican u Baxay, Sakow, Dhexe Juba, July '09.*

Xaalada hubinta cuntada ee dhulkaa xoolaha ee koonfur-bari Beero-xoolalayda Jubbada hoose waa sii xumanaysaa sababta oo ah xoolo badan oo xerada laga baxshay waxaana keenay roob yarantii *Guga* '09 ayna ku xigtay *Jilaal;* dhib badan oo dheer, khayraadkii oo dhulkii daaqa ka yaraaday waxa guurguur horey u bilaamay oo ku sii jeeda wabiga taasi waxay kordhisay cuduradii caadiga ahaa ee xoolaha iyo qiimihii biyaha iyo cuntada oo kordhay. Beero-xoolo dhaqatad Jubba hoose, beero roobaadkii galayda ee Guga ku baxayay way ba'een. Haynta xoolaha ee xoolo dhaqatada koonfur bari iyo beero-xoolo dhaqatada Jubbada hoose, labadaba lo'da iyoldo/riyo, waxay ka hoos mareen xariiqa cabirka caadiga waxayna u baahan yihiin 2-3 xilli ay heerka caadiga ugu soo noqdaan. Dadka xoolaha lihi caano may gadin, qiimaha xooluhuna waa hooseyay iyo hoos u dhac ganacsi isu bebedelka, suuqa gaarisa oo xoolaba oo hooseeye, dhalmada xoolaha iyo xaalada jirdhka xoolaha oo liita. Shaqalaan ka dhacday magalooyinka, iyo xilliyada cuntada oo mid laga boodo iyo shaxaad

Waxa ka duwan sida hore, xaalada hubinta cuntada soo hagaagtay ha-nololeedka dhinaca wabiyada oo dhan iyo hab-nololeedka beero-xoolo dhaqata ee degmooyinka Jubbada dhexe, iyo Kismaayo iyo Jammame ee Jubbada hoose. Hab-noloeedyadaas oo dhan cunto helidu waa hagaagtay sababtoo ah waxsoosaarka dalagga Guga oo fiicnaa Jubbada dhexe (10,300MT oo galay ah ama 210% oo *Gu* galay celceliska dagaalada sokeeye ka bacdi) iyo waxsoosarka dalagga aan caadiga ahayn (14,000MT oo galay ah) Dhulka beereedka Jubbada hoose iyo Jubbada dhexe. Roobab fiican oo *Hagaa ah ayaa* da'ay Juun-August 2009 oo keenay in dalagga xilliga aan caadi ahayn la iska beerto iyo midka iibkaba uusan kala go'in meelaha wabiga jubba uu maro, beero-xoolo dhaqatada kismayo iyo Jammaame, iyo xeebtaba. Meelaha wabiga ee labada gobol, beero-xoolo dhaqatada degmooyinka Jubbada dhexe iyo kismaayo iyo Jammame ee Jubbada hoose waxay ka faaiideysteen caano badan oo laga helay xoolihii u soo guuray.,fursad shaqo oo soo korodhay oo mushaar fiican leh iyo ganacsi isku bebedelka galayda iyo shaqada.

Falanqaynta xaalada nafaqada ee sikudhafan ee *Gu* '09 waxay muujnaysaa xaalada nafaqadu ay sii xumaanayso dhinaca dadka beer-xooloha dhaqatada iyo xooladhaqatada ee gobolada jubba dhexe iyo hoose iyadoo heer *Xun* ay ahayd *Deyrta* '08/09 gadaasheed oo ay hadda ugudubtay heer ***Aad u Xun***. arrintan waxa ugu wacan jirooyin, gaar ahaan shuban biyood xun ilaa March '09 ee hab-nololeedka oo dhan. Si kastab ha ahaatee dadka wabiga ag degan waxay muujiyeen wax yar oo hagaag ah xaalada nafaqo ayagoo ka yimi heer *Xun* una gudbay heer ***Iadifan***. Hagaagaasu nafaqadu waxa uu la xiriiraa helid kaluun, khudaar iyo caano (oo xoolahooda iyo xoolaha ku soo guuray ka heleen), Daqli la helay fursad shaqo oo kordhay, adeeq caafimaad la helay, marka loo barbar dhigo hab-nololeedyada kale. Xaaalada nafaqo ee barakacyasha kismaayo waa heer ***Xun*** ilaa iyo *Deyrta* '07/08. Guud ahaan xanaano darro dhinca caruuta, cabiida biyo aan nadiif ahyn qalabkii nadaafada iyo sidoo kale hawlaha caafimaadka ayaa ah qodobada keenaya nafaqa xumada gobolada Jubbooyinka.

***Baay iyo Bakool***

Xaalada hubinta cuntada ee Bakool waa sii xumaanaysaa ilaa *Deyrta '08/09* dhulka hab-nololeedka miyiga oo dhan iyo sida oo kale magaalooyinka. Qayb ka mid ah dadka , ama 190,000 oo qof oo beer-xoolo iyo xoolo dhaqato ama dadka miyiga waa hadda ama **Xiisad Cuntada iyo Habnololeedka ah oo aad u xun (XCHAX) (61% waa XCHAX) ama Gurmad Bani aadanimo (39% waa GB),** heerka digninta ee **Indho ku Hayn** ilaa lix bilood xilli ah (Julaay '09 - Des. '09). Gobolka Baay, xaalada hubinta cuntada isma badelin ilaa *Deyrta* '08/09. Halkaan bulshada xoolo-beerdhaqatada ee miyga waxaa loo aqoonsaday **Xadka Hubin La,aanta Cuntada (XHC),** marka laga saaro **Bardaale** (qayb ka mid ah degmada Baydhabo) Hab-nololeedka beero-xoolo dhatada xududana la leh gobolka bakool, halkaasoo 5,000 oo qof ay ku sugan yihiin **XCHAX** iyo 5,000 oo qof ay ku sugan yihiin **GB**. In lagu qiyaasay 20,000 oo qof oo saboolka magaalada baydhabo ah baa waxay ku sugan yihiin **XCHAX**.



*Galley Haaqday Iyow-kooyow tuulo, Xudur, Bakool, July '09*

Xaalada cunta hubinta beero-xoolalayda Bakool way ka sii daraysay ayna ugu wacan tahay xilligii afraad oo miruhu xumaadeen. *Guga* '09 waa 23% kali ah marka loo eego Celceliska Dagaalka Dabadii (CDD) sabatoo ah biyo la'aan ba'an oo soo food saartay markuu dalaggu ku jiray korida oo hakisay bixitaankii miraha, iyadoo roobabkii la filayey ay noqdeen; roobab aan caadi ahayn oo xadidan oo isla markiiba dhamaaday. Hab-nololeedka beero-xoolo iyo xoolo dhaqashada ayaa waxaa soo gaartay daaq iyo biyo yaraan, xaalada jidhka xoolaha oo xun, caanihii oo yaraaday, iyo qoyska oo isqaybiyey gurguurka xoolaha oon caadi ahayn awgeed. Daqligii xataa waa yaraaday sababtoo ah waxaa yaraaday beero falashadii, maalgashigii beeraha oo hooseya iyo shaqadii dilaalista oo ku yaratay suuqaqa xoolaha, iyo hoos u dhac ku yimid helitaanka shaqo maalmeedka iyo mushaarka shaqada. Qoysaska saboolka ah ee ku sugan waxay qabatimeen xal ay ku waajahayaan nolosha adkaatay oo ay ka mid yihiin; sida soo gurid xaabo badan, xubna ka mid ah qoyska oo magaalooyinka aaday, iyo raadin caawin.

Gobolka Baay, marka laga reebo **Bardaale** (qayb ka mid ah degmada baay) Hab-nololeedka beero iyo xoolo dhaqashada, xaaladda hubinta cuntadu waa caadi, maadaama ay heleen gu' wanaagsan 92009) oo wax-soo-saar fiican leh (106% Celceliska DagaalkaDabadii iyo 167% oo ah celceliska 5-sanno) taas oo raad ku yeelatay waxsoosaarka qoysaska, fursada shaqada iyo musharka. Waxaa lagu qiyaasay dhigaalka firida Baqaarada qoysaska in ay dhamaanayaan ilaa mudo 7 bilood ah. Awoodda wax iibsigu way korodhay iyadoo ay hoos u dhacday qiimaha firiga (cereals) iyo korodhka mushaharka, haddana waxa kaloo kordhay fursadda shaqada oo ay wheheliso korodhka baahida shaqada beeraha xilligan. Taa waxaa ka duwan, hab-nololeedka beero iyo xoolo dhaqashada **Bardaale** oo hubinta cuntada aad u sii xumaanaysay markii seddex sanno oo isku xidhiidhsan roobabku ku liiteen. Waxaa cidhiidhi galay hab-nololeekan helitaankiisa cunto maadaama seddex xilli dalag goosi uu xumaaday, islamarkaana kaydkii firiigu dhamaaday, daaqa xoolaha iyo biyhuna ay gaabaabsi yihiin taasoo keentay in xooluhu aad u xaatoobaan, caanuhu yaraadaan, iibka xoolaha iyo caanuhu xadidmaan. Saboolka meeshani waxay nolosha kula tacaalayaan inay hantitooda yar naft kula huraan (iibin badan) taasunu waxay dedejinaysaa inay ka cayrtoomaan, waxay kaloo nafta ku maareeyaan xaabo gurasho iyo goyn qoryo dhismo, iyo inay shaqo u raadsadaan meelaha shaqo laga heli karo ama ay soo meeraan in caawimo dadka ka helaan.

Falanqayn lagu sameeyay warka nafaqada ee hab-nololeedka xoolo iyo beero beeratada **Bakool** waxay tusaysaa xaalad nafaqo-daro **ba'an.** Taasoo ka soo noqotay xaalad aad halis u ah sida la soo sheegay *Deyrtii* '08/09. In arrinta nafaqadu ay hagaagto waxaa loo tirinayaa in lagu ladnaaday shaqooyinkii Bini'aadminimada marka lagu daro cunto qaybinta khaaska ah eek u aadan goobaha cayiman iyo mida guud, iyo arimo kale oo la xidhiidha helitaank cunto oo hagaagay. Si kastaba ha ahaatee, xaalada nabadgelyo oon deganayn waxay is-hortaagtay habsami u socodka hawlaha samafalka, waxaana la filayaa in nabadgelyadu ka sii darto bilaha soo socda. Xoolalayda reer Bakool, xaalada nafaqo waxay muujinaysaa xaalad joogta ah oo ***Aad u Halis ah.***xaaladaha jira waxa ka mid ah jiro ooy la socoto calaamado sheegaya caafimmadka oo soo xumaanaya, daryeelka caruurta oo liita nadaafad iyo cunto ahaanba, ayna weheliso nadaafadda guud iyo biyaha oo aad u xun. **Gobolka Baay** xaaladdiisa nafaqo waxay tilmamaysaa inay gaadhey meel **aad helis u ah** ee dadka xool iyo beero dhaqatada ah, taas aad moodo inay ka soo daraysey ilaa *Deyrta* '08/09 oo ay *dhici karto* in ahayd mid **Halis ah**. Xaaladdan nafaqo ee ka sii daraysa waxaa loo aanaynayaa xanuuno joogto ah oo heerkoodu siyaado yahay oo ka mid yihiin Shuban biyood (AWD) dhawaanahan baahay oo fiday, waxaana sii xumeeyay la'aanta tasiilaadka nafaqo iyo caafimaad daro, iyo tayo nooc cunto liitada oo carruurta la siiyo inta badan badar (messago iyo galley). Daryeel la'aanta caruurta ee joogtada ah, koriin xumaanta, la'aan kaabayaaasha biyaha iyo saxada ayaa si xun u aafeeyey xaalada nafaqo ayadoo ay waheliso cuduro iyo jiro badan arrimahaas oo dhan waxay sabab u yihiin nafaqa-darada xun ee ka jirta Gobolka Baay.

***Shabeelada Hoose iyo Dhexe***

Ku dhawaan kala badh ama 48% dadka ku nool Shabeelada dhexe waa dhibaataysan yihiin, ayadoo 158,000 oo qof ay u baahan yihiin **Gurmad Bani aadanimo (GB)** iyo 59,000 oo qof ay u baahan yihiin **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo aad u xun (XCHAX),** ayna la socoto saadaaal heerka digninta ee **Indho ku Hayn** ilaa iyo December '09. Hab-nololeedka xoolo-beero dhaqatadu way sii xumaanaysaa ilaa *Deyrtii* '08/09, si kastaba ha ahaatee, tirad guud ahaan **XCHAX** iyo **GB** aayaa wax yar is-dhimay ilaa iyo *Deyrtii* '08/09 (XCHAX waxay ahayd 164,000 iyo GB oo ahayd 65,000) taasoo ay sabab u tahay in xagga webiyada waxoogaa hagaag ay ka jireen. Reer magaalka saboolka ah ee ku sugan **XCHAX** wax yar bay is-dhimeen laga bilaabo *Deyrtii* '08/09 (XCHAX waxay ahayd 30,000) ilaa 25,000 oo qof. Shabeelada hoose, sidaas way ka duwan tahay, si muuqata ayey wax isaga badaleen una hagaagtay xaaladda cunto hubinta meelaha beerahaleyda wabiyada iyo habnololeedyada xoolo-beero dhaqatada, hadda waxa waxaa jira kaliya 5000 oo qof oo ku sugan **GB** (53,000 Deyrta '08/09) iyo 50,000 oo qof **XCHAX** (71,000 Deyrta '08/09). Sidoo kale waxa soo hagaagay xaalada cunto hubinta dadka saboolka ah ee magaalooyinka ee ka mid ah **XCHAX** waana 35,000 oo qof taas oo ka soo yaratay 65,000 oo qof *Deyrtii* '08/09.



*Suuqa Cawska, Jowhar Dhexe Shabelle, July 0'9*

Qodobada muhiimka ah ee qeexaya xaalada hadda ee hubinta cuntada ee shabeelada dhexe waa shan xilli roob oo xidhiidhsan oo celceliska wax soosaarkoodu uu hooseeyo ayna keentay roob xumo. Waraab xadidan iyo qarash la'aan beeraha la gashado. Xaalada dhul daaqsimeedka oo xumaatay taas oo keentay xoolaha oo u guura si aan caadi ahayn, manfaca xoolaha oo cad iyo caanoba aad yaraaday, bixidda iyo gadista xoolaha oo badatay, taasoo yaraysay tiro iyo tayaba. Xaaladda waxa sii haleeyay nabadgelyada oo sii xumaanaysa iyo qabaa'ilo isku-haya ama iskaga-horyimid khayraadka yare ee ka dhexeeya, iyo sidoo kale colaad siyaasadeed oo u dhexeeya kooxaha iska soo horjeeda oo ku halgamaya awooda talada. Gu'09 Gobolka waxsoosaarka dalaggu waa 44% Celceliska Dagaalka Dabadii iyo 50% Celceliska 5-sanno, kaas oo ah ka seddexaad ee ugu hooseeya intii tobban sanno ah. Fursadaha shaqadu waa xadidan tahay, isla markaana waxaa jira in ganacsiga xooluhu uu si muuqata u yaraaday maadaama xoolo gadmi karaa aysan jirin. Qoysaska saboolka ah ee magaalooyinka waxay u leexdeen qaabka is maradhaamada amd isdabaridda, sida dhuxul shidis, xaabo gurida, qoryo dhismo jarid, iyo inay shaqo u raadsadaan meelaha shaqo laga heli karo(Magaalo iyo Beero) ama ay soo meeraan in caawimo dadka ka helaan.

Sidaas si ka duwan, Shabeelada Hoose xaaladda Hubinta Cuntadu si muuqata ayey u soo raysatay sababta ugu muhiimsan ee ay u hagaatay waxay tahay iyadoo Gu'09 aaran ah oo ka gaar ah Guyaashii hore oo waxsoosarkiisu sareeyo xagga firida (miraha) iyo dalagyada kale ee dakhliga laga helo oo xilligan gu'ga iyo xagaaba maxsuul fiican lagu wado. Tan keliyihi ma hagaajin helitaanka ama haabsiga cuntada oo ay korodhay waxsoosaarkoodu, laakiin waxay kaloo abuuraysaa fursado dhaqaale lagaga heli karo iibint maxsuulada, mushaharada shaqada shaqaalaha batay, iyo dhaqdhaqaaqa ganacsiga suuqyada. Wax-soo-saarka miraha firida ee Gu'09 waa 118% Celceliska dagaalka Dabadii iyo 170% Celceliska 5-Sanno. Kaasoo ah kii 4aad ee ugu sarreeyey wax-soo-saarka ilaa iyo mudo toban sanno ah. Waxsoosaarkan wanaagsan waxaa kaloo u sabab ah hagaajinta kanaalada muhiimka ah ee waraabka, waxaa kodhay dhulkii la beeranayey, waxaa kordhay fursadaha waraabsiga. Xagga nabadgelyada lafteeda aad bay u fiicnaatay markii dadku helay amni iyo aamin oo yaraatay cidhiidhigii isu gudub la'aanta iyo dhulkii xooga lagu kala haystay, isqabsigii dhulka oo yaraaday, iyo dhul kala kiraysiga ama is amaanaysiga oo fududaaday.

Xagga daaqa xoolaha caws iyo caleeba xaaladaha deegaantu aad bay u fiican tahay, jidhka xooluhu ishin iyo ariba aad buu u hagaagay, taasu waxay keentay in xoolaha dhalitaankoodu aad u fiican yahay. Caano, cad iyo iiba waa laga liibaanay. Xagga taranta tirade xooluhu way korortay meesi kastaba ha ahaadee. Fursadaha shaqo maalmeedku iyo mushaharkuba way kordheen iyadd baahida shaqaalaha hawlaha beeruhu ay badatay GU'09.


Falanqaynta xaalada nafaqada ee siku dhafan oo ay fulisay Hay'adda FSNAU iyo jaalkeeda *Guga* '09 ka gadaal waxay muujinaysaa inay ka sii darayso ayna gaadhay xaalad **halis ah** meelaha hab-nololeedka beeraha-xoolaha dhaqatada ee shabeele ee ka timid xaalad daran ee *Deyrtii* '08/09. Xaalada ka sii daraysa waxaa loo tirinayaa xaalado jirooyin culays ku hayeye bilihii la soo dhaafay oo ay ka mid yihii: daacuun baahay, jadeeco iyo shuban-biyood faafay sida la soo tabiyey . Hadii cuduradaas faafaya la xakameeyo, waxa dhici karta in xaaladda nafaqadu ay hagaagto sida hubinta cuntadu tilmaamayso; in helitaanka noocyada cuntooyinka kala duduwan ay xaalad macquul ah ku sugan.Hab-nololeedka Webiga Shabeele xaaladda nafaqadu waxa tusinaysaa

Hab-nololeedka wabiga shabeele wali waxa uu ku sugan yahay xaalad Ba'an ilaa *Guga* '08, sida Barakacayaasha Shabeele (inta u dhexeeysa Merka iyo Afgoye). Deganaanshahaan, gaar ahaan barakacayaasha, waxaa loo filayaa inay tahay caawimada samafalka ah ee joogtada aha.Iyadoo ay sss tahay, waxaa jiray xaalado xanuuno kordhaya (>42% jiro oo la arkay labadii Asbuuc ee Baaristu socotay) iyo barakaca sii socda ee qoysaska nugul ee saboolka ah ee Mudasho ka yimid baa waxay yihiin arimaha xaalada sii dhabqinaya ee u baahan in loo feyignaado. Magaalada Mugadishu, xaalada nafaqo-daradu waxay u eg tahay mid ***Aad Halis u ah*** btaas oo ku salaysan falanqaynta, oo aan isbedel la taaban karo marna lagu arag shantii sanno ee ugu danbaysay.

***Hiraan***

Xaalada hubinta cuntada ee gobolka Hiiraan way ka sii daraysaa tan iyo *Deyrtii* '08/09. Dad lagu qiyaasay 245,000 oo qof oo reer miyi iyo meelaha magalooyinka. ama 74% oo qof oo dadka gobolka ah, ayaa waxay ku jiran xaalad beni 'aadanimo oo xun, taasoo 165,000 oo qof ayaa u baahan **Gurmad beni' aadan (GB),** inkastoo 80,000 oo qof ay ku jiraan **Xiisada Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo aad u xun (CHAX)**. Dadka badankiisa u baahan **GB** waa dadka miyiga ah (97%), kuwaas oo aad u soo batay ilaa iyo *Deyr* '08/09 ee la soo dhafay, waana 14% haddana waxaa lagu qiyasay 160,000 oo qof. Hab-nololeedka beero-xoolo dhaqata nawaaxigooda waa meelaha ugu wax yeelada xun dadkuna waxay gaarayaan 94,000 oo qof oo u baahan **GB** iyo 29,000 qof oo ku jira **XCHAX.** Tan waxaa la xiriira hab-nololeedka xoolaha halkaasoo 36,000 oo qof ay ku jiraan **GB** iyo 27,000 qof ayaa ku jira **XCHAX.** Qiyaas 30,000 oo qof oo ka tirsan hab-nololeedka wabiga ayaa u baahan GB. Tirada dadka magaalooyinka ku waxyeeloobay isma badelin ilaa iyo Bishii1aad,2009 taas oo 25,000 qof ay ku jiraan CHAX iyo 5,000 oo u baahan **GB**. Qiyasta hadda ee tirada dadka barakacay ee gobolka waxaa lagu qiyaasay 51,000 oo qof.

**Jaantuska 19: Isbeddellada Qiimaha Hadhuudhka/Maseggada ee Gobolka Hiiraan**



Xaalada sugnaanta cuntada ee gobolka Hiiraan way sii xumaanaysaa qodobo badan awgood ayna ku jiraan xilli kale oo roobku xumaaday , qilaafka taagan, iyo dhaqale sabaynaya iyo dhaqdhaqaq dhaqaale oo hooseeya. Helida cuntada waa kacsan tahay dhibaatooyin is biirsaday awgeed shan xilli oo delegu uu ka hooseeyay caadiga. Xilligan *Gu* '09 roobabka waxay ahaayeen 40-60% ee celceliska waqtiga dheer waxayna keentay delega oo aan wax fiican ka soo bixin oo xumaaday kaas oo ah 20% celceliska dagalada ka dib. Waxaa kale oo yaraa daqliga dadka soo galaya sababtoo shaqada beeraha oo yarayd iyo xoolaha beeca leh ee suuqa la gayn karo oo isdhimay. Dib u bixintii daynta la kal qaatay ayaa sii daba dheeraatay qoysaska miyi iyo magaalaba si ay cunto u soo gataan. Colaadaha oo kordhay, ama dagalda hada socda, iyo xiisadaha ka jira miyi iyo magaalaba taas oo keentay qasas isku jira oo ku yimid dhaqdhaqaaqa ganacsiga iyo dhaqaalaha. Cuntada oo la iibsan waayay qiimaha oo sare u kacay awgeed, kaas oo wali in door ah sareya marka loo eego celceliska 5 sanno, inkastoo qiimaha delega Julaay '09 uu ka hooseeyo marka loo eego bishaan oo kale sanadkii hore (Galay – 65% iyo masago - 75%) (Jaantuska 19). Ganacsi isku bebedelka **(GIB)** ee shaqada iyo masagada guduudan way soo fiicnaanaysaa marka la barbardhigo Julaay '08 iyo celceliska 5-sanno, ee 454% iyo 169%, say isugu xigaan. Sidoo kale GIB ee masagada guduudan iyo rida caadiga ah waxay leeyihiin isbebedel isku mid ah. Si kastaba ha ahaatee, qoysas yar ayaa ka faa,iidaysan kara awoodaas wax iibsi ee ee hagaagtay, maadama ay jirto shaqo helid xadidan iyo iyadoo ay yaratay xoolaha la gadi karo sababtoo ah beec fiican laguma helayo

Falanqaynta nafaqada ee macluumaadka barista ku yimid, isbebedelka soo galida goobaha caafimaadka iyo meelaha qudinta macluumaadku waxuu sheegayaa ***Heer Aad u Xun*** xaalada nafaqo meelaha xoolo-beero dhaqatada iyo ***Heerka Xun*** ee xaalada nafaqo wabiyada agtooda iyo hab-nololeedka xooladhaqatada gobolka Hiiraan. Tani waxay tilmamaysaa xaalada xun ee nafaqo meeelaha hab-nololeedka ee xoolo-beer dhaqatada laga soo bilaabo *U- ekaanshaha heer aad u xun ee Deyrta* '08/09, iyadoo u eg in ay ku xiran tahay jirooyin badan oo isduldul fuulay (51.4%) lana soo tabiyay waqtigii nafaqo barista ee Abriil April '09 ayna weheliso jiritaanka dhibaaatooyinka sugida cuntada ee gobolka. Arinta kale, xoolo dhaqatada iyo hab-nololeedka wabiyada waxay tilmaameen jiritaanka heer ***Xun*** *laga bilaabo Deyr* '08/09, xaaalada u kaalmaysay in ay sii jirto xaalada xun ee tilmaamayashaa hubinta cuntada ayna keentay waxyeelooyin xun oo iska soo daba noqnoqday waxna yeelay cunto sugida qoyska. Walwalka wayn waa xaalada nabadgelyo oo aan degenayn taas oo saamaysay dhaqdhaqaaqa kaalmada beni 'aadanimo horseedayna joogida barakacayaasha. Taasna waxaa kayimid koritaan nafaqo daro dadka ay saamaysay sida ay tilmaantay macluumaadka barnaamijka quudinta khaasatan hab-nololeedka wabiyada oo ahayd (>20%) iyo tirada degan ee caruurta soo galaysa goobaha quudinta oo nafaqadoodu aad u xuntahay.

***Gobolada Dhexe***

Xaalada guud ee hubinta cuntada ee gobolada dhexe (Galgaduud iyo Galkacyo) way ka sii dareen tan iyo Deyrtii '08/09, tirade dadka oo u baahan **Gurmad-bai aadanimo (GB)** waa kordhay ilaa 20-21% gobolada dhexe hab-nololadoda oo dhan. Dhibaatada xumaanteedu waa sii darsanaysa, hadda 79% dadka galgaduud iyo 51% dadka mudug ayaa waxay ku jiraan **Xiisad Cuntada iyo habnololeedka oo aad u xun (XCHAX) ama Gurmad Bani aadan (GB).** hab kale oo lagu cabiro xumaanta korodhay waa midan badanaaba ama 75% ee 440,000 qof ee dhibka ku jira waxay u baahan yihiin **GB.** 440,000 qof ee dhiban, qiyaastii 385,000 waa reer miyi xoolalay ah iyo 55,000 qof oo reer magaal sabool ah. Qiyaastii 124,000 oo qof waa **Xiisad Cuntada iyo hab-nololeedka oo aad u xun (XCHAX) iyo 319,000 oo qof waxay u bahan yihiin Gurmad Bani aadanimo (GB).** Waxa kale oo jirta digniin guud oo dhibkii dhexdhexaadka ahaa laga baqayo in uu isu bedelo mid siixumaada inta aan la gaarin Dec '09, wxayna ku xirnaan doontaa siday dagaaladu u socdaan iyo iska horimaadyadu todobaadyada iyo bilaha soo socda.



*Qoysas Barakacay, Caadubwaaq, Galgadud, July '09*

Xaalada hubinta cuntada waa ay sii xumaanaysaa taas oo ay keentay dhibaatooyinka is biirsaday ee xiliyo badan oo roobkii la waayay, qiimaha cuntada iyo waxa aan cuntada ahayn oo sare u kacay, iyo colaadoo sii badatay. Cunto helidu waa ay xumaatay habnololeedka xoolalayda oo dhan ayna keentay xaalada dhulka daaqa oo aad u xumaatay ( biyo iyo baad) taas oo sabatay xaalada jirdhka xoolaha oo xumaaday, dhalmada xolaha oo yaraatay ama ma jiran kuli noocyada xoolaha oo dhan. Xoolo badan oo la iibiyay ama la qashay oo wax u dhimay tirade xoolaha la dhaqan lahaa. Iyo tiro yar oo suuqa wax ka goyn karta lana gadi karo. Xoolalayda saboolka ah waxay hada noqdeen faqri (caydh) markii xoolihii oo dhami ka baxeen, waxayna bilaabeen in ay soo aadan magaalooyinka iyo tuulooyinka ayagoo kaalmo raadinaya. Beero-xoolo dhaqatada waxaa ku dhacay dalaga oo u bixi waayay sabtoo ah dabaylo sare dalagu markuu yaraa kuwaas oo qalalashy dalagii. Dalagyada kale ee helay roob dhexdhexaad ah waxaa wax u dhimay cayayaan (Degmada ceeldheer ee gobolka Galgaduud.) dalag xumada hada waxaa sii weheliya dhibaato kulmisay waxyeeladeda xilliyadii hore oo xumaa.

Xaalada gobolada dhexe waxa sii xumaynaya iska hor'imaadyada khayraadka ku salaysan sida Xarardhere iyo ceeldheer ee u dhaxeeya Alshabab iyo maliishiyada meesha u dhalatay taas oo keentay barakac dad dhan (187,000) iyo kaalmada bani 'aadan.imo oon gaadhi karin. Qiimaha dalaga weli waa sareeyaa marka loo eego gobolada kale, fursada shaqaduna waa yartahay sababtoo ah beero ama dhismayaal laga shaqeeyo waa yar yiin. Qoysasku weli waxay ku xiran yihiin isdabarid si ay cunto u helaan, sida gadasho ama deyn qaadasho, xaabo soo ururin/qalabka guryaha lagu dhiso, u haajirid magaalooyinka waawayn ayagoo shaqo raadinaya dadkana kaalmo waydiisanaya( wax aan cunto ahan ama cunto).

*Guga*- '09, baarista xaalada isku dhafan ee nafaqada oo ay samaysay FSNAU iyo haya'da kale waxay ka muujisay welwel xaalada nafaqada laba meelood oo hab-nololedka xoolaha dhaqatada gobolada dhexe. Habnololeedka Hawdka waxaa laga soo tabiyay xaalad ***Xun*** heerka nafaqada, khatarna u ah inay sii xumaato, inkastoo ay tilmaamayso wax yar oo hagaag ah marka loo eego deyrtii08/09 oo xaaladdu aad u xumayd. Xaaladaan waxa isku biirsada qodobo kala duwan oo ka mid yihiin xaalad cunto xumo , barakaca joogto ah, iyo cuduro badan oo ay weheliyaan la'aanta adeega caadiga ah iyo kaalmada bani'aadninimo dadka dhibaataysan.

Hab-nololeedka xoolo dhaqatada ee Caduunka waxaa laga soo tabiyay xaalad nafaqo daaro ***Xun oo soo jireen ah*** , qarkana ay u saran tahy in ay sii xumaato, taas waxa tabiyay tilmaamyaasha hubinta cuntada oo sii xumanaya iyo kaalmadaii bani' aadnimo oo aan jirin. Baaristu waxay kaloo sheegtay jirooyin badan iyo adeega guud oo an jirin. Si kastaba ha ahatee, awood safalka oo sii yaranaya ayaa waxa u sabab ah xaalad nabadgelyo oo aan degenayn ee gobolada dhexe. Dhulka digirtu ka baxdo ee xoolo-beero dhaqatad habnololeedkoodu yahay iyo xoolo dhaqatada xeebta deexda, xaalada nafaqo aad uma xuma oo faraha kama bixin oo waxay muujinaynsaa heer ladifan

***Waqooy-bari***

Xaalada hubinta cuntada ee hab-nololeedka xoola dhaqatada Hawdka iyo Caduunka ee koonfurta Nugaal iyo waqooyiga Mudug way xumaatay iyadoo ahayd **Xiisada Cuntada iyo habnololeedka ah oo aad u xun (XCHAX** lahayd xalaada digniintadhexdhexad u gudubka gurmad bani'aadanimo (GB) *Deyr*'08/09) hadana noqotay **Gurmad bani'aadanimo** *Guga* '09. Tirada guud dadka dhibaataysan Bari, Nugaal iyo waqooyga Mudug waxaa lagu qiyaasa 210,000, oo qof oo 145,000 qof ay sabool magaalo yihiin. Tirada guud ee dadka dhibaatadu hayso waa 169,900 ama 79% ay yihiin **XCHAX** iyo 44,100 qof ama 21% ay yihiin **GB**. Waxaa kale oo jira 66,000 barakacayaal ah gobolka kuwaas oo u baahan caawimo



*Tulud Geel ah aad Caato u ah, Tula Oman, Hawd, July '09*

Xaalada hubinta cuntada waa ay sii xumatay dhulka habnololeedka xoolo dhaqatada ah ee Hawdka iyo Caduunka, taasoo ay keentay sanad kale oo roobabku xumaadeen. Kani waa xiligii afaraad oo roobku xumaado xilliyo isku-xiga (*Deyr* '07/08, *Gu* '08, Deyr '08/09 iyo *Gu* '09), taas oo saamaysay xaalada daaqa iyo biyaha ee xoola-layda Hawd iyo Caddun , iyo sidoo kale dhulka xoolo dhaqatada ee deexda waqooyiga gobolka mudug iyo gobolka Nugaal. Xaaalada dhulka daaqa oo xun, iyo xoolaha oo aan ka guuri Karin oo dhulkuba aanu isdhaamin ( sababtoo ah xaalada dhulk daaqa oo xun dhanka waqooyi oo idil yo bartamaha Somaliya), baa waxay horseeday xooluhu in ay jilcaan daalaana, dhalmada xooluhu way yartahay ama jiraanba inta badan, caanaha oo yar, iyo xoolo badan oo baxay kana dhigay hayntii xoolaha mid ka hooseysa gundhigga (baseline).

Biyo dhaamis ayaa ka socda oo qiimaha foostadu/barmiil ka sareyso 200% kan cadiga ah. Inkastoo qiimaha firidu uu hoos udhacay ilaa Julaay '08 weli waa sareeyaa marka loo fiirsho celceliska 5 sanno iyadoo qoysas sabool ah oo badan ay qaabkay wax u cuni jireen iska bedleen oo ay haatan gataan firida (mesego) iyagoo is daayey bariiska, si loo yareeyo qiimaha ku baxaya cuntada. Dhulka abaaruhu waxyeeleen shaqo majirto sabatoo ah wax maalgashanaya ma jiraan xaga dhismayaasha iyo dulalydii suuqa xoolaha oo yaraday. Dakhiligii soo gali jiray ninka saboolka ah e xoolo dhaqatada ah wa yaraday sabatoo ah xoolo beec lagu heli karo waa yaradeen. Qoysaska faqriga ahi waxay samaysteen qaab is dabarid, ayna ka mid tahay gubida dhuxusha, iyo kaalmo raadsasho ( mid cunto iyo mid lacageed) magaalooyinkana waa u hayaameen.

Falanqaynta xaalada nafaqada ee la baaray ee waqooyi bari Guga dabayaaaqadiisa waxa la arkay isbedel xaga nafaqada ah badanaba hab-nololeedyada oo dhan waxii ka danbeeyay *Deyr* '08/09. Golis/Gagaab iyo Karkaar habnololeedkooda xoolaha waa uu xumaaday oo uu gaaray ***Heer Xun*** kana bilowday *feejignaata* iyo heer la mid ah *feejignaanta* dabayaaqada Deyrta'08/09. Hab-nololeedka dooxada Nugaal ee xoolo dhaqatada ah waa ay xumaatay ahna *arrin ka lidata waqtiga Deyrta*'08/09 noqotana heer ***XUN*** , sidoo kale, dhulka banaan ee Soolka bari xaaladoodu waa ay xumaatay oo waxay noqotay arin ***Aad u xun*** kana timid heer *feejignaan* waqtigan *Deytar* '08'09. xaalada nafaqo ee Hab-nololeedyda Hawdka iyo Cadduunka waxay tibaaxaysaa mid xun oo ka sii dareysa. habnololeedkan waxaa keenay tilmaamyaasha hubinta cuntada oo u muuqda iay hoos udhac tilmamayan sida soosaarkii caanaha oo hoos u dhacay, biyo la'aan iyo adeega caafimaadka oo liita

Welwelka ugu wayn waa barakacayaasha Boosaaso,Garoowe,Galkacyo, iyo qardho oo daba dheeraatay kuwaas oo hada loo kala saaray heerar, ***Aad u xun*** iyadoo wax isbadal ahi uusan dhicin marka laga soo bilaabo waxii ka danbeeyay *Deyr '08*, Xaalada welwelka ah waxa keenay qodobo badn oo iskashaday, kana mid yahay jirooyinka oo badan, cuntada oo aan la babadali karin qiimaheeda oo sareeya awgeed iyo xananada ciyaalka oo aan fiicnayn.

warbixinta kooban ee gobollada

***Waqooyi galbeed***

Xaalada hubinta cuntada waa soo xumaatay guud ahaan dhulka hab-nololeedka xoolo dhaqatda ah iyo Xoolo-beero dhaqatada ah ee gobollada waqooyi galbeed. Xaalada hada, hab-nololeedka xoolalayda ee Hawd iyo dooxada Nugaal waxaa loo aqoonsaday in ay tahay **Xiisad cuntada iyo hab-nololeedka ah oo ad u xun (XCHAX)** oo leh *digniin dhexdhexad u gudubka Gurmad Bani aadanimo (GB)* ka hor Dec. '09. Xoolo iyo beero dhaqato gobolka Togdheer iyo Soolka hab-nololeekoodu waa liitaa, waxaana loo aqoonsaday XCHAX, laakiin *Khatarteedu sareyso noqotay Gurmadbaniaadanimo (GB) ka hor dhamaadka* Dec. '09**.** kulli xoolo-beero dhaqatada gobolada Awdal iyo W. Galbeed , iyo sidoo kale hab-nololeedka Golis/Guban waxay ku hareen **XCHAX.** Guud ahaan dadka dhibaataysan ee reer miyiga waxaa lagu qiyasaa 20,000 oo qof oo xaalkoodu yahay **GB** iyo 240,000 oo xaalkooodu yahay **XCHAX**. meelaha magaalooynka ah, tirada dadka saboolka ah ee ku sugan xaalada **XCHAX** waxaa lagu qiyaasay 150,000 qof (36% kordhay), iyadoo 30,000 qof ay ku hareen **GB.**



*Messago Ba'day roob la'aan awgeed, Garabis, Hargeysa, W. Galbeed, July '09.*

Xaalada hubinta cuntada ee gobollada waqooyi galbeed way xumaatay si tartiibtartiib ah sababo isbiirsaday awgood oo ahaa roobabka oo sadex xilli yaraa, kuwaasoo si xun wax u yeelay dhulka daaqa ah iyo xaalada biyaha, keentayna xoolaha caato noqdaan, iyo dhalmadooda oo yaraatay iyo xoolaha oo aad loogu talaxtagay oo xoolo badan laga isticmalay. Meelaha beer-xoolo dhaqatada ah wax soo saarkii dalagy waa xumaaday (Firida, calafka xolaha). Biyo xumi aya ka jirta Soolka, Hawdka iyo Nugasha sare, Halkaas oo biyo dhaamisku uu socdo ilaa 9 bilood. Cunto helida saboolka way xumaatay sabatuna waa xoolihii oon waxba laga soo saarayn wax gala maahee; markaa neefkii waxna ma goynayo, caanana malaha, xitaa beeraha waxba kama soo go'in oo dalaggu waaqaali haddii la helo, iyo shaqala'aan oo hawlo la dhiso aanay jirin. Waxaa jira barakac soo muuqanaya oo ay barakacayaan dadka caydhoobay ahi ee xoolaha dhaqatada ( Tusale, Gobolada Sool,Togdheer, iyo Sanag) kuwaas oo u soo dhaqaaqay dhinaca xeryaha barkacayassha ee magallyinka ku yaal iyo tuulooyinka ayagoo raadinaya wax macaawimo ah. Isdabarida qoysaska danyarta ah waxaa ka mid ah is-qaybinta qoyska, cuntada qaaliga ah oo la iska daayo cunideeda oo la gato mida raqiiska ah ee Gudaha, ka boodida sadexda waqti ee wax la cuno mid ama labo(1-2) iyo iyo bulshada oo ay taageero waydiistaan (wax cunto ah ama lacag).

Falanqaynta nafaqada ee isku jirta ee xilliga *Guga* '09 waxay sheegaysaa hagaag xaalada nafaqo ee Ga hab-nololeedka Golis/Guban dhina galbeed ayagoo markii hore ahaa mid *Aad halis u ah ayaa isu baddashay mid Ba'an*, halka bariga Goliska ee Sanaag ay muujisay wax soo yara hagaagi taasoo markii hore ahayd mid *Aad halis u ah* ayaa isu badashay mid ***Ba'an*** kadib *Deyrta* '08/09. Hagaga xaalada nafaqo ee galbeedka Golis/Guban habnololeedka waxaa qayb ka qaatay hagaaga xaalada hubinta cuntada iyo deeqaha bani 'aadanimada ee la fuliyey. Xaalada nafaqo ee Habnololeedka Soolka waa xumaatay aydoo makii hore ahayd *Feejignaan* hadana waxay noqotay ***ladifan, Waxayna ku xiran tahay xaalada hubinta cuntada oo sii xumanaysa***

Hab-nololeedka dooxada Gebi oo soo liidatay ayaa iska baddashay halkii hore ee ahayd *Ba'naan* ayay hadda noqotay mid ***Halis ah***. Meelaha kale ee laga arko ka sii darida waa dadka xoolo-beer dhaqatada Togdheer iyo gobolada galbeed ayagoo ahaa mid *Ba'an* hadana noqday ***Halis*** iyo hab-nololeedka gobolka togdheer iyadoo ahayd mid *Ba'an* ayay hadana noqotay mid ***Halis ah***, qaybta koonfureed ee Hawdka ee gobolka Togdheer waxaa loo aqoonsaday in uu yahay ***Aad halis u ah***, ka sii darida waxaa ka qayb qaatay yaraantii roobabka *Guga* '09. Taas waxaa dheer qoysaska oo aan haysan biyo nadiif ah oo la cabi karo taas oo kordhisay shuban biyood, toosna u saamaysay xaalada nafaqo ee dad waynaha. Hawdka Hargiesa iyo gobolka Sool iyo hab-nololeedkadooxada Nugaal waxay ku qiimaysan tahay ***Halis;*** si kastaba ha ahatee waxay muujisay khatar ka sii darida ah.Barakacayaasha magaalda Burco waxaa lagu qiimeeyay inay yihiin ***Halis,*** iyagoo qiimayntoodu ahayd xilligii hore mid *Ba'an,* halka xaaladda nafaqo la'aanta dadka kusoo barakacay magaalda Berbera lagu qiimeeyay in ay tahay mid ***Halis ah***. Xaaladda nafaqo ee barakacayaasha magaalada Hargeysa wax isbaddel ah am leh waana ***Ba'an tahay***.

**Daabacaadaha iyo Warsaxaafadeeyada soo Socda ama Soo Baxay**

*FSNAU/FEWSNET Casriyayn macluumadka suuqa, July 2009*
*FSNAU/FEWSNET Casriyayn macluumaadka cimilada, July 2009*
*FSNAU Warbixinta farsamo ee Taxanaha ee Xaalada Nafaqo, September 2009 (Forthcoming)*
*FSNAU Warbixinta Farsamo ee Taxanaha ee Baarista Guga '09 ka badib (Forthcoming)*
*FSNAU Warbixinta Farsamo ee Taxanaha ee Buuga SIS, February 2009*
*FSNAU Warbixinta Farsamo ee Taxanah ee Buuga Macluumaadka Nidaamka Koox, February 2009*
*FSNAU Warbixinta farsamo ee Taxanaha ee Buuga Maaraynta Goobta Shaqada, February 2009*

*XUSID: Daabacadahaas iyo Warsaxaafadeedyadaas Waxaa Laga Helayaa Websatyka FSNAU website: www.fsnausomali.org*

Technical & Managerial Support

European Commision

Funding Agencies